

Xubnaha Buug-Gacmeedka 2018



BuckeyeHealthPlan.com

Gobolka Central/Southeast

BHP-MM-070618

TUSMADA BUUGA

OGEYSIIS	4
LAMBARO TALEEFANADA EE MUHIIMKA AH.....	5
MACNAHA ERAYADA AAD KA HELI DOONTO BUUG-GACMEEDKAN.....	6
KUSOO DHAWOOW QORSHAHA CAAFIMAADKA EE BUCKEYE	7
KAARARKA AQOONSIGA.....	8
MACLUUMAADKA XUBNAHA CUSUB.....	9
ADEEGYADA IYO FAA’IIDOOYINKA	9
Adeegyada ay daboosho Buckeye	9
Teknoloojiyada Cusub.....	14
Adeegyada Caafimaadka Maskaxda Iyo Ku Xadgudubka Maandooriyaha/Daroogada	14
Start Smart For Your Baby® (Bilowga Billicsan ee Ilmahaaga)	15
CentAccount™ - Barnamijka Abaalmarinta	16
Gaadiidka.....	16
Adeegyada Indhaha	17
Adeega Ilkaha.....	17
Nasiino.....	17
Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye Caafimaad ee 24-ka Saacadood ah	17
Barnaamijka Neefta.....	18
Isku Xirrida Xubnaha	18
TEXT4BABY.....	19
Xasuusinta Daryeelka Caafimaadka.....	19
Warsidaha Xubnaha.....	19
Maaraynta Daryeelka	19
Caafimaadka Maskaxda iyo Habdhaqanka.....	20
Adeegyada Aysan Daboolin Buckeye ama Gargaarka Caafimaadka Ohio	22

CAYMISKA DARYEELKA ASSAASIGA AH	22
Doorashada Caymiska Daryeelka Assaasiga Ah (PCP).....	22
BEDDELLIDA BIXIYAHAAGA DARYEELKA ASSAASIGA AH	22
DARYEELKA DEGDEGGA AH	23
Daryeelka Dibada-Deegaanka, Saacadaha Shaqada Kadib, iyo Degdegga Ah	23
Daryeelka Dibada-Deegaanka, Saacadaha Shaqada Kadib	23
ADEEGYADA DEGDEGGA AH	23
DAAWOYINKA DHAKHTARKU UU QORO.....	24
CABASHOYINKA (DACWADA).....	25
Cabashooyinka (Dacwada).....	25
Cabashooyinka	26
Dhagaysiga Dowlada.....	26
Foomka Cabashooyinka/Racfaanada.....	28
JOOJINTA XUBINIMADA.....	29
Joojinta Xubinimada	29
Luminta Xaq u Yeelashada Gargaarka Caafimaadka	29
Luminta Warqadda Caymiska (Shahaadada Daboolid Kalsooni leh)	29
Cusboonaysiinta Xubinimada Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MCP) ee Tooska ah	29
Dhammaynta Xubinimadaada Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MCP)	29
Sababta Saxda ah ee Joojinta Xubinimada	29
<i>Waxyaabaha ay tahay inaad Maskaxda ku Hayso Haddii u Beddeli Xubinimadaada</i>	<i>30</i>
Xubinimada Ikhtiyaariga ah	30
<i>Ka Reebida Xubinimada Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MPC)</i>	<i>30</i>
Buckeye Ma Joojin Kartaa Xubinimadayda?	31
XUQUUQAHA XUBINIMADA	31
Xuquuqdaada Xubinimada.....	31
WAAJIBAADKA XUBINIMADA.....	33
Waajibaadkaaga Xubinimada.....	33
MACLUUMAAD KALE.....	34
Shil Dhaawac ama Jiro ah (Ku beddelida qof kale/Subrogation)	34
Caymiska Caafimaad ee Kale (iskuduwidda Faa'iidooyinka Caymiska).....	34
WARGELINTA ASTURIDA.....	35
Waajibaadka Hay'adda Daboolan:	35

Isticmaalada iyo Shaacinta Macluumaadka:	36
Heshiiska Afka ee Isticmaalka iyo Shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan	38
Isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan, ee u baahan qoraalkaaga ogolaansho	38
Xuquuqdaada	39
Macluumaadka Xiriirka	40
DARDAARANKA HORE	40
Waxaad Leedahay Ikhtiyaar	40
Dardaaranka Qofka Nool	41
Amarka Dib -Ha-U Naaxin Qofka Bukaanka Ah	42
Awoodda Sharci Ee Garyaqaanka	42
Baaqa Daawaynta Caafimaadka Maskaxda	42
Dardaaranka Hore	42
Deeqitaanka Xubnaha Iyo Unugyada Jirka	44
CAAWINAADA LUQADDA.....	45
QORAALKA TAKOORID LA'AANTA.....	46

OGEYSIIS

Haddii aad qabto wax dhibaatooyin ah ee akhriska iyo fahamka macluumaadkan ama waxyaabaha kale ee macluumaadka Qorshaha Caafimaadka (Buckeye), fadlan kula xiriir telefoonka Xubinta Adeegyadeena 1-866-246-4358 (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750) waxaad ka helaysaa caawimaad lacag la'aan ah. Waxaan kaa caawin karnaa in lagu sharxo macluumaadka ama aan ku siino macluumaad oraah ah oo afka Ingiriisiga ah ama luuqadaada aasaasiga ah. Waxaa laga yaabaa inaan hayno macluumaadkan oo lagu daabacay luuqadaha kale qaarkood ama siyaabo kale. Haddii uu daciif yahay araggaaga ama maqalkaaga, caawimaad gaar ah ayaa lagu siin karaa.

Waxaad kale oo ka heli kartaa macluumaadka Buckeye oo ku qoran shabakadda www.buckeyehealthplan.com. Dhammaan xubnaha waxay la xiriiri karaan Buckeye iyadoo la adeegsanayo shabakadda. Baaritaan kasta oo nala soo waydiiyo wuxuu heli doonaa jawaab hal maalin oo shaqo gudaheed ah fariimaha aan ka dhex helno boggeena internetka. Tani waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, codsiyada macluumaadka xubnaha sida kaarka aqoonsiga, Buug-gacmeedka xubnaha iyo bixinta diiwaanada.

Adeegyada kale ee lagu bixiyo shabakadda waxaa ka mid ah:

- Wararka iyo dhacdooyinka
- Diiwaanka laga baaro dhakhaatiirta, dhakhaatiirta takhasuska ah, iyo goobaha muhiimka ah
- Macluumaadka Barnaamijyada

Buug-gacmeedka xubnaha wuxuu bilaabanaya bisha Janaayo 1, 2018.

LAMBARO TALEEFANADA EE MUHIIMKA AH

Xaaladda degdegga ah: 911 ama lambarka xaaladda degdegga ah ee maxaliga

Adeegga Xubnaha ee Buckeye: 1-866-246-4358 **Khadka Talo-Bixinta Kalkaaliye ee 24-ka saacadood:** 1-866-246-4358 **Adeegyada Gaadiidka:** 1-866-246-4358 **Adeega Gudbinta ee Ohio:** TTY kaliya: TTY only: 1-800-750-0750

Saacadaha Adeegyada Xubnaha ay shaqeeyaan waa Isniin ilaa Jimce, 7:00 subaxnimo ilaa 7:00 Fiidnimo, marka laga reebo fasaxyada. Buckeye waa xiran yahay maalmaha ciidaha ee soo socda:

- Maalinta Sanadka Cusub
- Maalinta Dhalashada Martin Luther King Jr Maalinta
- Xuska Qaranka
- Maalinta Xorriyadda
- Maalinta Shaqaalaha
- Maalinta Mahad-Celiska
- Maalinta Ciida Masiixiga

Buckeye sidoo kale waxaa la xiri doonaa laba maalmood oo dheeraad ah sannadka oo dhan. Waxaan ku wargelin doonaa xubnaheena xaritaanka xafiiska ka hor inta aan la xirin xafiiska ugu yaraan 30 maalmood ka hor xiritaanka.

Fasaxa kusoo aada maalin Sabti ah waxaa la qaadan doonaa maalinta Jimcaha ee ka horaysa. Fasaxa sidoo kale kusoo aada maalin Axad ah waxaa la qaadan doonaa Isniinta ka dambaysa.

Lambarka Macaamiisha ee Ohio: 1-800-324-8680

Qalabka maqalka fududeya: 1-800-292-3572

Magaca Caymiska Daryeelka:

Telefonka Caymiska Daryeelka#:

Saacadaha aan ahayn shaqada ee Caymiska Daryeelka #:

Magaca Caymiska Daryeelka Ilmahaga:

Telefonka Caymiska Daryeelka Ilmahaga #:

Telefonka saacadaha aan shaqada ahayn ee Caymiska Daryeelka Ilmahaga#:

Farmashiyaaga:

Telefonka Farmashiyaha #:

Dhakhtarkaaga Ilkaha:

Telefoonka Dhakhtarkaaga Ilkaha #:

MACNAHA ERAYADA AAD KA HELI DOONTO BUUG-GACMEEDKAN

Faa'iidooyinka: Adeegyada laga heli daryeelka caafimaadka ee karo Qorshaha Caafimaadka Buckeye

Xaaladda Degdegga ah: Adeegyada deg dega ah waa adeegyada dhibaatooyinka caafimaad ee aad u aragto in ay aad halis u yihiin ooay qasab tahay in isla markiiba inuu ku daweyo dhakhtar.

Cabasho: Cabasho ku saabsan Buckeye ama mid ka mid ah caymisyada Caafimaadka.

Baaris Caafimaad (Healthcheck): Waa Barnaamijk adeeg caafimaad oo dhamaystiran oo looga hortagayo cudurada oo ay heli karaan macaamiisha Gargaarka caafimaadk laga bilaabo dhalashada ilaa maalinka uuna gaarin 21 sano. Barnaamijk waxaa loogu talagalay si loo ilaaliyo caafimaadka iyadoo la samaynayo ka hortag dhaqso ah si loo ogaado loona daaweyo dhibaatooyinka caafimaadka.

Kaarka Aqoonsiga: Waa kaarka xubin kasta oo ka mid Buckeye looga baahan yahay xafiiska dhaqtarka ka hor inta aadan helin daryeel

MHA: Waaxda Adeegyada Caafimaadka Maskaxda iyo Qabatinka Maandooriyaha ee Ohio.

Ka Qaybgalaha Adeegga: Waa dhakhtarka, isbitaalka, ama bixiye daryeel caafimaad oo kale oo heshiis la saxiixday Buckeye si ay u siiyaan daryeel caafimaad macaamiisheena.

Caymiska Daryeelka Asaasiga ah: Caymiska Daryeelka caafimaadka shakhsiyeed (waa in ay kala qayb galaan Buckeye). Bixiyaha Daryeelka Caafimaad waa dhaqtar qaas ah, koox dhaqaatiir ah, kalkaaliso sare, ama koox kalkaalisooyin sare oo loo tababaray daawaynta qoyska (Dhaqtarka Guud) cudurada gudaha ku dhaca iyo cudurada Carruurta.

Oggolaanshaha Hore: Waa hanaanka in aad marka hore ansixin ka hesho Buckeye si loo ogaado Habboonaanta adeeg ama daawo Oggolaansho hore lagu siiyo ma dammaanad qaadi karo caymiska. Dhakhtarkaaga ayaa dalab oggolaansho ah usoo gudbin doona Buckeye si loogu ansixiyo adeegyada qaarkood si ay u daboolaan caymiskaaga. Haddii Buckeye aysan raalli ka ahayn codsiga, waan kuu soo sheegi doonaa waxaan ku siin doonaa macluumaad ku saabsan habka cabashada Buckeye iyo habka racfaanka iyo xaqa aad u leedahay dhagaysi dawladeed. Intaa waxaa dheer, adeegyada bukaan-jiiifka waxaa laga yaabaa in ay helaan dib u eegis dabagal ah si aan ula socono horumarka iyo baahidda caafimaad ee daryeelka bukaan-jiiifka.

Gudbinta: Waa qaabka Caymiska Daryeelka Asaasiga ah uu kaaga talo bixiyo ama kuu dalbo adeegyo caafimaad ka hor intaadan helin. Caymiska Daryeelka Asaasiga wuxuu kuu wici doonaa ama kuu qorshayn doonaa adeegyadan; wuxu ku siin doona qoraal oggolaansho ah si aad ugu qaadato goobaha aad ka hesho adeegyada lagu gudbiyay; ama waxay kuu sheegi doonaan waxaad samayn lahayd. Xaaladaha qaarkood, Buckeye waxay kuu oggolaan karaan in qof takhasus leh uu gudbinta kuu sameeyo.

Takhasus leh: waa dhakhtar bixiyo nooc gaar ah oo adeeg caafimaad sida xanuunada cagaha (dhakhtar cagta) ama cudurada wadnaha (dhakhtarka wadnaha).

KUSOO DHAWOOW QORSHAHA CAAFIMAADKA EE BUCKEYE

Ku soo dhawoow Qorshaha Caafimaadka ee (Buckeye), oo hoos timaada Shirkadda Centene. Adigu hadda waxaad tahay xubin ka mid ah qorshe caafimaad, sidoo kale loo yaqaan qorshaha daryeelka maareysan.

Buckeye ma samayn doonto midab takoor ku saleysan jinsiyad, midab, diin, jinsiga, nooca galmada, da'da, naafada, asalka wadan, xaaladda halyeeyga, isirka, xaaladda caafimaadka, ama baahida adeegyada caafimaad ee laga helo adeegyada caafimaadka.

Waxaa muhiim ah in la xasuusto in ay waajib tahay in aad hesho adeegyada ay dabooli karto Buckeye laga bilaabo tas-hiilaadka iyo / ama caymisyada adeega ee guddiga Buckeye. Fiiri bogaga 9 ilaa 21 wixii macluumaad ah ee ku saabsan adeegyada ay bixiso Buckeye. Marka keliya ee aad isticmaali karto adeeg bixiyayaasha aan ku jirin guddiga Buckeye waa:


- Adeegyada Degdegga ah
- Xarumaha caafimaadka dawladda dhexe ay aqoonsan tahay/ xarumaha caafimaadka ee miyiga
- Umulisoooyinka kalkaalisoooyinka caafimaad ama kalkaaliyaal haysta shahaado xirfadeed
- Bixiyayaasha la aqoon sanyahay ee qorshaynta
- Waaxda Adeegyada Caafimaadka Maskaxsa iyo Qabatinka Maandooriyaha Xarumaha la aqoon sanyahay ee Caafimaadka Maskaxda Bulshada iyo Xarumaha Daawaynta ama
- Waaxda Ohio ee Adeegyada Khamriga iyo Qabatinka Maandooriyaha ee xarumaha daawaynta la aqoonsan yahay.
- Guddi caafimaad bixiya oo ay ansixisay Buckeye si ay ku arkaan

Waxaad ka codsan kartaa buuga Caymisyada ee qoran adigoo wacaya Waaxda Adeegyada Xubinta ama ku soo celiya boostada aad ku heshay warqadda xubnimada cusub iyo kaarka aqoonsiga xubinta. Buuga Bixiyeyaashu wuxuu taxayaa dhammaan liiska caymisyada gudiga ka mid ah iyo sidoo kale caymisyada kale ee aan gudiga ka mid aheen ee aad isticmaali kartid si aad u hesho adeegyo. Waxaad sidoo kale booqan kartaa barteena internetka ee BuckeyeHealthPlan.com si aad u aragto macluumaadka adeeg bixiyaha ee ugu dambeeyey ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka 1-866-246-4358, Qalabka Maqalka Fududeeya: 711, Isniinta - Jimcaha, 7:00 subaxnimo ilaa 7:00 fiidnimo, si aad u hesho caawimaad.


KAARARKA AQOONSIGA

Waa in aad hore u heshay kaarka aqoonsiga xubinimada Buckeye. Xubin kasta oo qoyskaaga ka tirsan oo ku soo biiray Buckeye waxay heli doontaa kaar u gaar ah. Kaararkani waxay bedeli doonaan kaararka Gargaarka Caafimaad ee bil kasta. Kaar kasta waa fiican yahay ilaa inta uu qofka xubin ka yahay Buckeye.

Haddii aad uur leedahay, waxaad u baahanaysaa inaad Buckeye ogaysiiso iyo sidoo kalena soo wacdo marka ilmahaagu dhasho si kaar aqoonsi cusub ilmahaaga aan ugu soo dirno.



(Qaybta hore Kaarka Aqoonsiga)



(Qaybe dambe Kaarka Aqoonsiga)

HAD IYO JEER HAYSO KAARKAAGA AQOONSIGA

Waxaad u baahan doontaa kaarka aqoonsiga mar walba oo aad hesho adeegyada caafimaadka. Taas macnaheedu waa in aad haysataa kaarka aqoonsiga Buckeye marka aad:

- U tagto Caymiska Daryeelka aasaasiga ah.
- Aad aragto takhasuse cudurka ama bixiye caafimaad ee kale.
- Tagto qolka deg-dega ah.
- Tagto xarun daryeelka degdega ah.
- Tagto isbitaalka sabab kasta.
- Hesho taageero caafimaad.
- Qaadato daawada dhakhtar qoray.
- Marto baaritaan caafimaad.

Ka wac Adeega Xubnaha Buckeye sida ugu dhakhsaha badan telefoonka 1-866-246-4358 (qalabka fududeya maqalka 1-800-750-0750) haddii:

- Aadan helin kaarkaaga weli.
- Wax macluumaad ah ee ku qoran kaarka ayaa khalad ah.
- Waxaad lumisay kaarkaaga.
- Waxaad dhashay ilmo.

MACLUUMAADKA XUBNAHA CUSUB

Haddii aad haysatay Gargaarka Caafimaadka ee lacagta la bixinayay ka hor inta aadan noqon xubin Buckeye ka mid ah oo adeegyada daryeelka caafimaad horay loo ansixiyey iyo / ama loo qorsheeyay, waxaa muhiim ah in aad wacdo adeegga xubnaha *si deg deg ah* (maanta ama sida ugu dhakhsaha badan). Xaaladaha qaarkood, muddo yar ka dib markii aad is diiwaan geliso, waxaa laga yaabaa inaan kuu ogolaano in aad daryeel ka hesho adeeg bixiye aan ahayn guddiga adeeg bixinta Buckeye. Intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa inaan kuu ogolaano in aad sii wadato helitaanka adeegyada ay ansixisay Gargaarka Caafimaadka ee qarashka la bixiyo. **Hasa ahaatee, waa inaad wacdaa Buckeye ka hor inta aadan helin daryeelka. Haddii aadan na soo wacin, waxaa laga yaabaa inaad awoodin in aad hesho daryeel iyo/ama in lacag-sheegashadaada laga yaabo in aan lagu siin. Tusaale ahaan, waa inaad wacdo adeegyada xubnaha haddii aad u leedahay adeegyada soo socda ansixin hore iyo/ama qorsheyn:**

- Xubin jirka, dhuuxa lafta, ama xubin unugyada assaasiga ah ee dhiiga ee la beero
- Daryeelka saddexda bilood ee ugu dambeeya ee uurka (uurka), oo ay ku jirto dhalmada
- Qalliinka bukaan-socodka/bukaan-jiifka
- Ballan la sameynta daryeel aasaasi ah ama bixiye qaas ah
- Ballan la sameynta bixiye daryeel assaasi ah
- Ku Daweynta kiimiko ama shucaac
- Daaweynta marka ka bixida isbitaalka kadib ee 30-kii maalmood ee la soo dhaafay
- Adeegyada ilkaha ama araga oo aan joogtada ahayn (tusaale ahaan biraha ilkaha ama qalliinka)
- Qalabka Caafimaadka
- Adeegyada aad ku hesho guriga, oo ay ku jiraan caafimaadka guriga, daaweynta, iyo kalkaalinta

Ka dib markii aad is diiwaan geliso, bixiyaha daryeelka caafimaadka (MCP) wuxuu kuu sheegi doonaa haddii mid ka mid ah daawooyinka aad hadda isticmasho u baahan yahay oggolaansho hore taasoo aan markii hore aysan u baahanayn oggolaansho markii ay Gargaarka Caafimaadka/Medicaid bixisay adeegga lacagta ah. Waxaa aad muhiim u ah in aad eegto macluumaadka uu bixiyo Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MCP) iyo la xirii adeegyada xubnaha ee Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka (MCP) haddii aad qabto wax su'aalo ah. Sidoo kale waxaad eegi kartaa website-ka Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka (MCP) si aad u ogaato haddii ay daawooyinkaaga u baahan yihiin oggolaansho hore. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad dib ula xiriirto xafiiska daawo qoridda si aad ugu gudbiso codsi oggolaansho hore Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka (MCP) haddii loo baahdo. Haddii daawadaada ay u baahan tahay oggolaansho hore, ma heli kartid daawada ilaa uu bixiyahaaga codsi u gudbiyo Bixiyahaaga Daryeelkaga Caafimaadka (MCP) iyo la ansixiyo.

ADEEGYADA IYO FAA'IIDOOYINKA

Adeegyada ay daboosho Buckeye

Hadii aad tahay xubin ka mid ah Qorshaha Caafimaadka Buckeye waxaad sii heli doontaa dhammaan adeegyada caafimaad ee daruuriga ah ee uu daboolo Gargaarka Caafimaadka isaga oo lacag la'aan ah. Si kastaba ha ahaatee, sida aad ku heli lahayd adeegyada waxaa laga yaabaa in ay ka duwan tahay sida aad u heshay adeegyada waqtigii la soo dhaafay. Waxaa muhiim ah in la akhriyo macluumaadka soo socda taasoo sharaxaysa sida loo helo adeegyada sida xubin ka noqoshada Buckeye. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xirii Adeegyada Xubnaha Buckeye.

Buckeye wuxuu daboolaa dhamaan Adeegyada caafimaad ee muhiimka ah ee Adeegyada Caymiska Caafimaadka.

- Daaweynta irbadaha (acupuncture) ee loogu talagalay maareynta xanuunka ah xanuunka madaxa iyo xagga hoose ee dhabarka
- Gaadiidka anbalaasta iyo bukaan qaadaha
- Kalkaaliso aqoon u leh adeegyada umulisada
- Kalkaaliso aqoon u leh adeegyada guud
- Adeegyada Daliigidda (dhabarka)

- Adeegyada Ilkaha (waxaa ka mid ah laba baaritaan oo sanadkii carruurta iyo dadka da'da wayn afka laga baarayo lagana nadiifinayo, inta badan waxa lagu heli karaa adeegga lacagta ah ee Medicaid/Gargaarka Caafimaadka)
- Adeegyada Daawaynta kobcinta carruurta da'doodu tahay dhalashada ilaa lix sano Adeegyada Baarista (shaybaar, raajada)
- Qalab caafimaad oo muddo raagi kara
- Adeegyada degdegga ah
- Qorsheynta qoyska iyo sahayda
- Adeegyada Xarumaha Caafimaadka Dawladda Dhexe ama Adeegyada Rugta Caafimaadka ee Miyiga
- Adeegyada Xarumaha Dhallanka ee Gaarka ah ee xarumaha dhallaanka ee gaarka ah ee bilaashka ah (wac adeegyada xubnaha xarumaha aqoonta leh)
- Adeegyada caafimaadka Guriga
- Daryeelka Goobaha Caafimaad (daryeelka bukaanka aadka u jiran, tusaale ahaan, bukaanada qaba kansarka)
- Adeegyada bukaan-jiiifka- isbitaalka
- Sahayda Daawada
- Adeegyada caafimaadka dhimirka iyo balwadda
- Adeegyada Goobta Xannaanada ee dhaqan celinta muddada gaaban (wac adeegga xubnaha si aad u hesho adeeg caymisyada; Xarunta (ODM) waxay go'aansan kartaa inay lacag ka dhigto adeegyada Gargaarka Caafimaad/Medicaid)
- Foosha (daryeelka hooyada - dhalmada kahor iyo dhalmada kadib oo ay ku jiraan adeegyada halista uur qaadista) iyo adeegyada cudurada haweenka
- Adeegyada isbitaalka Bukaana-socodka
- Daaweynta jirka iyo xirfadaha
- Baaritaan jirka ah oo looga baahan yahay shaqo ama ka qaybqaadashada barnaamijyada tababarka shaqada haddii baaritaanka aan aysan lacag la'aan ku samayn ilo/qolooyin kale
- Adeegga Daawanta (cagaha)
- Dawooyinka lagu qoray, oo ay ku jiraan qaar ka mid ah dawooyinka lagaa siiyo farmashiyaha
- Baaritaanka raajada ee ka hortag ah (naaska) iyo kansarka baaritaanka ilmo galeenka (dheecan ilmo galeenka)
- Bixiyaha Adeegyada daryeelka Muhiimka ah
- Nadiifinta Kelyaha (cudurka kalyaha)
- Adeegyada Nasashada ee loogu tala galay xubnaha Dakhliga Dheeraadka ah ee Amniga Bulshada/SSI ee da'doodu ka yar tahay 21 sano, sida ay ansixisay CMS ee ka mid ah ka dhaafida (waiver) lagu dhaqmo ee 1915(b) iyo sida lagu sharxay sharciga OAC 5160-26-03
- Baarista iyo la-talinta buurnida xad dhaafka ah
- Adeegyada carruurta qaba naafonimo Caafimaad qabka (Title V)
- Durriinka (Tallaalada)
- Adeegyada takhasuslaha
- Adeegyada hadalka iyo maqalka, oo ay ku jiraan qalabka maqalka caawiya
- Adeegyada Araga (indhaha), oo ay ku jirto doorashada la ballaariyey ee muraayadaha indhaha iyo xuubka indhaha la galiyo (in ka badan waxa lagu heli karo adeegga lacagta ee Gargaarka Caafimaadka/Medicaid)

- Baaritaanada carruurta caafimaadka qaba (Healthchek/Baaritaanka-Caafimaadka) ee ka yar da'da 21 sano
- Daboolida daaweynta irbadaha (acupuncture) wuxuu ku xadiddan yahay maareynta xanuunka ee madax-xanuunka goonjabka (migraine) iyo xanuunka xagga hoose ee dhabarka.

Haddii ay qasab kugu noqoto in aad ka safarto gurigaaga 30 maayl ama in ka badan si aad u hesho adeegyo daryeel caafimaad, Buckeye waxay ku siin doontaa gaadiid ku geeya kaana soo celiya xafiiska bixiyaha. Fadlan kala xiriir Adeegyada Xubnaha 1-866-246-4358 ugu yaraan 48 saacadood (laba maalmood oo maalmaha shaqadda ah) ka hor wixii ku saabsan wax caawimaad ah. Waxa u dheer caawimaada gaadiidka ee Buckeye bixiso, xubnaha weli waxay heli karaan caawimaad xagga gaadiidka ah ee ku saabsan adeegyada qaarkood iyada oo loo marayo waaxda degmada deegaanka ee adeegyada shaqada iyo qoyska ee Barnaamijka Gaadiidka Xaaladaha aan deg dega ahayn (NET). Wac waaxda degmada ee adeegyada shaqada iyo qoyska wixii ah su'aalo ama kaalmo ee laga rabo adeegyada Gaadiidka Xaaladaha aan deg dega ahayn (NET).

Buckeye waxay dabooshaa dhammaan adeegyada caafimaad ee daruuriga ah ee adeegyada uu daboolayo Gargaarka Caafimaadka (Medicaid), oo ay ku jiraan waxyaabaha soo socda:

- Adeegyada Caymiska Daryeelka assaasiga ah. Xubnaha way arki karaan wixii ah Caymiska Daryeelka Assaasiga ah ee daboolan ee adeegyada aasaasiga ah ee daboolan, oo ay ku jiraan:
 1. Baaritaanka qofka wayn ee caafimaadka qaba ee Sanad walba ah.
 2. Durriinka/tallaalada
 3. Baaritaanada jirka ee looga baahan yahay shaqo ama ka qaybqaadashada barnaamijyada tababarka shaqada haddii baaritaanada aysan lacag la'aan u bixin ilooyin/qolooyin kale.
 4. HEALTHCHEK (Baaritaanka Caafimaadka)

Healthchek (Baaritaanka-Caafimaadka) waa faa'iido ah baaritaanka, cudur ogaanshaha, iyo daaweynta xilli hore oo soo noq noqda (EPSDT). Healthchek (Baaritaanka-Caafimaadka) wuxuu daboolaa baaritaanada caafimaadka, tallaalada (durriinka), waxbarashada caafimaadka, iyo baaritaanada shaybaarka loogu talagalay qof walba oo xaq u leh Gargaarka Caafimaadka (Medicaid) ee da'doodu ka yar tahay 21 sano. Baaritaanadan muhiimka ah waxay hubinayaan in ay qabaan carruurta caafimaad iyo in ay ka kobcayaan xaga jirka iyo maskaxda. Hooyooyinka waa in ay sameeyaan baaritaano iyo carruurtana waa in lagu sameeyaa baaritaano marka ay dhashaan, marka dao marka n lagxaga jirka iyo , iyo marka ay jiraan 1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood jir. Markaa kadib, carruurta waa in ay helaan ugu yaraan hal baaritaan sanadkiiba ama sida uu sheegayo qoraalka ugu dambeeyey ee "Talooyinka loogu talagalay Daryeelka Caafimaadka Carruurta ee Ka Hortaga ah (Recommendations for Preventative Pediatric Health Care)," oo ay soo saartay Bright Futures/American Academy of Pediatrics.

Healthchek (Baaritaanka-Caafimaadka) sidoo kale wuxuu daboolayaa baaritaanada caafimaadka, aragga, ilkaha, maqalka, nafaqada, koritaanka, iyo baaritaanka caafimaadka maskaxda oo buuxda, waxaa intaa sii dheer daryeelka kale ee ah si loo daaweeyo dhibaatooyin xagga jirka, maskaxda, ama dhibaatooyinka ama xaaladaha kale ee lagu ogaaday baaritaan. Healthchek (Baaritaanka-Caafimaadka) wuxuu daboolaa adeegyada baaritaanada iyo daaweynta badankood. Haddii baaritaan ama adeeg aanan la daboolin, waxay u baahan doonaan oggolaansho hore.

Adeegyada Healthchek (Baaritaanka-Caafimaadka) waxay xubnaha ku heli karaan lacag layada daaweynta waxay u

- Baaritaano ka hortag ah ilmaha mar dhow dhashay, dhallaanka, carruurta, dhalinyarada, iyo dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 21 sano.
- Healthchek (Baaritaanada-Caafimaadka):
 - Baaritaan caafimaad oo Buuxa (oo uu la socdo dib u eegis lagu sameynayo koritaanka caafimaadlka jirka iyo maskaxda)
 - Baaritaanada aragga
 - Baaritaanada ilkaha
 - Baaritaanada maqalka
 - Baaritaanka nafaqada
 - Baaritaanada korriinka
 - Baaritaanka Sunta Dhiiga
- Baaritaan shaybaar ee da'dooyinka qaarkood

- Tallaalada
- Daryeel Caafimaad oo loo baahan yahay in dib loogu noqdo si loo daweeyo dhibaatooyinka caafimaadka jirka, maskaxda, ama dhibaatooyin iyo waxyaabo kale oo caafimaadka oo la helay inta lagu jiro baaritaanka. Tani waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn, adeegyada ah sida:
 - booqashooyinka la booqdo bixiye daryeel aasaasi ah, takhasusle, dhakhtarka ilkaha, dhakhtarka indhaha iyo caymisyada caafimaadka kale ee Buckeye si loo ogaado loona daaweeyo dhibaatooyinka ama cilladaha:
 - daryeelka isbitaalka ee bukaan-jiifka ama bukaan-socodka
 - booqashooyinka rug Caafimaad qabka
 - qoritaanka daawooyinka
 - baaritaanada shaybaarka
- Waxbarashada caafimaadka

Waxaa aad muhiim u ah inaad hesho baaritaano iyo tijaabooyin ka hortag ah si caymisyadaada Caafimaadka ay u heli karaan dhibaatooyinka caafimaadka xilli hore una daaweeyaan, ama ay kuugu gudbiyaan dhakhtar takhasusle ah si lagu daaweeyo, ka hor inta aysan dhibaataada noqon mid aad u sii qatar ah. Adeegyada qaarkood waxay u baahan karaan soo gudbin inay ka helaan Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah (PCP) ama oggolaansho hore oo ay bixisay Buckeye. Sidoo kale, wax ku saabsan qaar ka mid ah waxyaalo ah EPSDT ama adeeyo, bixiyahaaga wuxuu codsan karaa oggolaansho hore ee Buckeye si ay u daboosho waxyaabaha xadidan ama aan u daboolneen xubnaha ka weyn da'da 20 sano. Fadlan eeg bogga 13 si aad u aragto adeegyada u baahan gudbinta iyo/ama oggolaansho hore.

Iyadoo qayb ka ah Healthcek (Baarintanka-Caafimaadka), adeegyada maareynta daryeelka waxaa heli kara dhammaan xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 sano ee qaba baahida daryeelka caafimaadka ee gaarka ah. Fadlan eeg bogga 19 si aad u ogaato wax dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada maareynta daryeelka oo ay bixiso Buckeye. Waxaad heli kartaa adeegyada Healthcek (Baarintanka-Caafimaadka) adigoo wacaya xafiiska Bixiyahaaga Daryeelka ee Assaasiga ah (PCP) ama dhakhtarkaaga ilkaha iyo samaysato ballan. Hubi inaad u sheegto iyaga inay tahay wax ku saabsan Healthcek (Baarintanka-Caafimaadka). Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijka Healthcek (Baarintanka-Caafimaadka), ama haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan helitaanka daryeel ku saabsan adeegyada daboolan, ballan la samaynta bixiye, helitaanka gaadiid, ama oggolaansho hore, fadlan kala xiriir waaxda Buckeye ee Adeegyada Xubnaha lambarka 1-866-246-4358 (qalabka fududeya maqalka 1-800-750-0750).

Fadlan eeg foomka la socda bug yarahan ee xubnaha waxaad u baahan doontaa inaad buuxisid oo dib ugu soo celi Buckeye Health Plan (Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye) (tiimbaraha boostada oo lacagtiisa la bixiyey ayaa la socda). Waxaynu u isticmaaleynaa macluumaadka inaan ku siino adeeyo si aan u caawino qoyskaaga inay sii ahaadaan dad caafimaad sii qaba.

Adeegyada Is-gudbinta waa adeegyada aad heli karto adiga oo aan ruqsad ka haysan Caymiska Daryeelkaaga ee Assaasiga ah ama Buckeye. Waxaa dhici karta in aad adigu isku gudbisoo bixiye Buckeye ah wixii ku saabsan adeegyada soo socda:

- Xanuuno iyo / ama adeegyada caafimaadka dumarka, oo ay ku jiraan:
 - Daryeelka Dhalmada ee dhalmada ka hor iyo dhalmada kadib, oo ay ku jiraan adeegyada halista uurka.
 - Baaritaanka raajada ka hortag ah (naaska) iyo kansarka ilmo galeenka (baaritaanka loo yaqaan pap)
- Dalligidda
- Daryeelka Cagaha (cagaha)
- Kalkaalisadda umulisada la aqoonsan yahay
- Daryeelka ilkaha joogtada ah
- Adeega indhaha ee joogtada ah (araga), oo ay ku jiraan muraayadaha
- Kalkaalisada Caafimaad guud ee la aqoonsan yahay
- Xarumaha Daryeelka Deg dega ah
- Adeegyada Takhasuska
- Raajada joogtada ah iyo shaybaadhka (dhakhaatiirta takhasuska ayaa sidoo kale kuu diri kara baaritaano dheeraad ah)
- Adeegyada isbitaalka ee bukaan-socodka ((hababka qalliinka qaarkood waxaa laga yaabaa in looga baahan yahay oggolaansho hore)

- Adeegyada Goobta caafimaad
- Waxbarashada Caafimaadka
- Adeegyada carruurta qaba naafonimo caafimaad (Title V)
- Nadiifinta Kelyaha (cudurka kalyaha)
- Gaadiidka baska kursiga curiyaanimada ee xaaladaha aan-degdega aheyn

Waxaad isku gudbin kartaa mid ka mid ah bixiyaha caafimaad ee soo socda:

- Adeegyada degdega ah, oo ay ku jiraan gaadiidka ambalaaska (eeg bogga 23).
- Adeegyada Qorsheynta Qoyska iyo sahayda daawada ee Bixiyaha Qorsheynta Qoyska ee la aqoonsan yahay (oo ku qoran buuga Bixiyaha caafimaadka).
- Daryeelka Xarunta Caafimaadka Dowladda dhexe ama Xarunta Caafimaadka Miyiga ee aqoonta leh (oo ku qoran buug Bixiyaha caafimaadka).

Kuwa soo socda waa adeegyada u baahan in Bixiyaha Caafimaadkaagu kuu gudbiyo iyo in aad ogolaansho hore ka hesho Buckeye:

- MRIs
- MRAs
- Qallinka lagu yareeyo Cayilka
- Maaraynta Xanuunka
- Scan-ka PET
- Scan-ka CAT
- Scan-ka Cardiac Nuclear
- Adeegyada Goobta Xannaanada ee dhaqan celinta muddada-gaaban.
- Daryeelka Caafimaadka GurigaHomehealthcare
- Daryeelka Guriga bukaanka (daryeelka dadka aadka u jiran, tusaale ahaan, dadka qaba kansarka)
- Adeegyada bukaan-jiifka isbitaalka (isbitaal seexinta deg dega uma baahna warqad gudbin ah ama oggolaansho hore)
- Sahayda daawada (qaar ka mid ah sahayda cudurka kaadi macaanka ee dareeraha iyo sonkorta dhiigga oo aan u baahnayn oggolaansho hore)
- Qalabka Caafimaadka ee mudo la haysan karo
- Adeega hadalka iyo maqalka, oo ay ku jiraan qalabka maqalka
- Daawaynta jirka iyo baxnaaninta
- Daryeelka ilkaha ee aan joogatada ahayn (tusaale ahaan, qalliinka)
- Adeega indhaha aan joogtada ah (araga) (tusaale ahaan, qalliinka)
- Gaadiidka anbalaasta ee xaalada aan deg dega ahayn
- Qalliinka dib u habaynta muuqaalka
- Adeegyada daawaynta Horumarinta ee carruurta da'doodu tahay dhalashada ilaa lix sano
- Baaritaanka cudurka firka (dhalmada ka hor, baaritaanka kansarka, baaritaanka carruurta qaba dib u dhac koritaanka ah)

Adeegyada Ka Baxsan Shabakadda

Daboolida ceymiska adeegyada ka baxsan shabakadda waxaa la heli karaa marka Buckeye Health Plan (Qorshaha Caafimaadka Buckeye) aysan awoodin inay bixiso adeeg laga maarmaan ah oo daboolan si ah hab haboon iyo wakhti habboon.

Teknooloojiyada Cusub

Buckeye waxay rabtaa inay hubiso inaad heli kartid daryeelka caafimaad ee ugu dambeeyey. Waxaynu leenahay koox ilaalisa horumarka daaweynta. Tani waxaa ka mid ahaan kara daawo cusub, tijaabooyin, qalliin ama ikhtiyaaro ah daaweyn kale. Kooxdu waxay eegayaan inay hubiyaan in daaweynta cusubi tahay mid ammaan ah. Waanu kuu sheegi doonaa adiga iyo dhakhtarkaaga wixii ku saabsan adeegyada cusub ee hoos yimaada faa'iidooyinkaaga.

Adeegyada Caafimaadka Maskaxda Iyo Ku Xadgudubka Maandooriyaha/Daroogada

Adeegyada caafimaadka maskaxda iyo ku xadgudubka maandooriyaha ayaa laga heli karaa qorshaha. Adeegyadan waxaa ka mid ah:

- Adeegyada Caafimaadka
- Daaweynta La Adeegsado-Daawo Ee Loogu Talagalay Dadka Balwada U Bartay
- Daawooyinka Lagu Bixiso Xafiiska
- Baaritaanka Cilmi Nafsiya
- Daaweynta Maalinta Caafimaadka Maskaxda
- Adeegyada Daaweynta Cillada Isticmaalka Maandooriyaha/Daroogada oo lagu dari Taageerida Soo Kabashada ee Saaxiib, Isbitaal Dhigida oo Qayb Ahaan ah, iyo Daaweynta Guriga
- Adeegyada Dhaqanada Daaweynta
- Dhaqan-Celinta Bulshadeed
- Adeegyada Taageerida Cilmi Nafsiya Bulshada

Marka lagu daro adeegyadan, laba adeeg oo cusub ayaa sidoo kale la heli karaa: Daaweynta Bulshada ee Qeexan iyo Daaweyn Ku Salaysan Guriga oo Xoog ah.

Haddii aad u baahan tahay adeegyada daaweynta caafimaadka maskaxda iyo / ama daaweynta ku xadgudubka maandooriyaha bixiyayaasha caafimaadka maskaxda ee qandaraaska Buckeye la leh ayaa ku qoran liistada Buuga Bixiyayaasheena, waxaana laga heli karaa barteena internetka ee BuckeyeHealthPlan.com. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa adeegyada xubnaha lambarka 1-866-246-4358 si aad u heshid caawin aad u hesho caymisyada ee jooga deegaankaaga.

Gobolka Ohio waxuu u ansixiyey Bixiyayaasha Daryeelka Caafimaadka (Medical Care Providers -MCP) inay sameeyaan oo fuliyaan barnaamijyo si ay u caawiyaan xubno gaar ah inay helaan daawooyin aan caafimaad ahaan muhiin u ahayn si ay la dhisaan lana sii wadaan xiriir bixiyahooda iyo / ama farmashiyahooda si la isku duwo daaweynta. Xubnaha loo xushay barnaamijka Buckeye waxaa la siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo la ogeysiinayaa xuquuqdooda maqalka ee gobolka, sida ku habboon.

Xubnaha ku qoran barnaamijka Qorshaha Adeegyada Isku-duwan (Coordinated Services Plan – CSP) waxay lahaan doonaan xaddidaad ah dhakhaatiirta iyo farmashiyada ay u isticmaali karaan daawada la kontoroolo, marka laga reebo xaaladaha degdega ah. Xubnaha ayaa sidoo kale u lahaan doona awood inay beddelaan caymisyada loo qoondheeyey sida waafaqsan siyaasadda.

Adeegyada Dheeraadka Ee Buckeye Iyo Faa'iidooyinka Ay Heli Karaan Dhammaan Xubnaha

Haddii aan si kale Loo sheegin, si aad u hesho adeegyada ku qoran hoos ka wac Adeega Xubnaha Buckeye lambarka 1-866-246-4358 (qalabka fududeya maqalka 1-800-750-0750). Saacadaha shaqada Adeegyada Xubnaha waa Isniinta ilaa Jimcaha, 7 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo marka laga reebo fasaxyada ku qoran bogga 5. Waxaad sidoo kale wici kartaa Adeegyada Xubnaha wixii ku saabsan caawimaada xagga

Cabashooyinka iyo Rafcaanka; haddii aad ka hesho biil adeegyada ee uu soo diray bixiye; hadii aad doonayso in aad heshid daryeel bixiye ama beddeshid bixiyahaaga daryeelka ee assaasiga ah; hadii aad doonayso caawimaad luqadeed; ama aad doonayso in aad hesho caawimaad adeegyada caymiskaaga daboolayo. Waxaan halkaan u joognaa in aan ka jawaabno dhamaan su'aalahaaga iyo in aan wax ka qabano wixii walaac ah ee aad qabto. Buckeye waxay siisaa xubnaha adeegya iyo faa'iidooyinka soo socda ee dheeraadka ah.

Start Smart For Your Baby® (Bilowga Billicsan ee Ilmahaaga)

Barnaamijka Start Smart for Your Baby waxaan ugu tala galnay dumarka uurka leh ama dhalay ilmo. Waxaynu halkan u joognaa inaan ku caawino marka aad ku jirto uurka iyo kadib. Waxaan taageero u fidinnaa siyaabo kala duwan si aan waxyaalaha kaaga dhigno wax dhib yar inta aad ku jirto wakhtigaan muhiimka ah. Ujeedadeenu waa adiga inaad lahaato uur caafimaad leh oo aad siiso dhallaankaaga bilawga ugu fiicnaanta ee nolasha.

Barnaamijkani waa LACAG LA'AAN oo xitaa waxaad ku kasban kartaa abaalmarin booqashada dhakhtarkaaga. Waa inaad u tagtaa dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan ee aad u maleynaysid inaad uur leedahay. Booqashooyinka dhakhtarka hore iyo kuwa caadiga ah ba waxay muhiim u yihiin caafimaadka ilmahaaga.

Barnaamijkani waxaa loogu talagalay adiga haddii:

- Aad uur leedahay ama aad ku fekereyso inaad uur yeelato.
- Aad halis dheeraad ah u tahay dhalmada dhiciska sababtuna tahay sigaar-cabista, isticmaalka qamriga, isticmaalka daroogada, niyad-jabka ama horay u-dhalida dhicis.
- Ma rabtid inaad uur yeelato laakiin aad u leedahay galmada firfircooni.
- Waxaad qabtaa su'aalo ama aad u baahan tahay caawimaad xagga arrimaha caafimaadka haweenka.

Barnaamijkani waxuu bixiyaa:

- Booqashada dhakhtarka oo lacag la'aan ah. U tag dhakhtarkaaga sida ugu dhakhsaha badan ee aad u maleynaysid inaad uur leedahay. Booqashooyinka dhakhtarka hore iyo kuwa caadiga ah ba waxay muhiim u yihiin caafimaadka labada xubnaha iyo ilmahooda.
- Ka caawinta helitaanka dhakhtar ama isbitaal iyo sameynta ballamo dhakhtar.
- Adeegyada iyo taageerada caafimaadka maskaxda.
- Kalkaaliyad caafimaad oo si gaar ah loogu tababaray inay daboosho baahiyahaaga.
- Ilaha iyo taageerada naasnuujinta.
- Kaa caawinta joojinta sigaarka, khamriga ama daroogada.
- Caawinta helitaanka ilaha bulshada.

Tallaabooyinka ugu horeeya ee aad qaadata:

Haddii aad uur leedahay, fadlan nala soo socodsii adigoo buuxinaya Ogeysiinta Uurka (Notification of Pregnancy – NOP).

Halkan waa sida

1. Barta internetka oo geli xisaabta xubnimadaada;
2. Buuxi warqadda NOP ee aan siinay ama kuu soo dirnay;
3. Ama, naga soo wac 1-866-246-4358.

Haddii aadan uur aheyn, wac mid ka kalkaaliyaasha 1-866-246-4358 weydiininaad la hadasho "Start Smart nurse." Ma rbaa inaad ogaato wax badan? Naga soo wac 1-866-246-4358.

- Uurka - \$50 (Booqashooyinka dhalmada ka hor 3aad, 6aad, iyo 9aad - NOP ayaa loo baahan yahay)

- Dhalmada ka dib - \$75 (booqashadu waa inay noqotaa 21 ilaa 56 maalmood dhalmada ka dib)
- Booqashada Ilmaha Nabada Qaba - \$ 100 (Waa inuu buuxiyaa 6 booqasho 15-kii bilood ee ugu horreeya nolosha)

Waxaan leenahay siyaabo badan oo kaa caawin kara inaad lahaato uur caafimaad qaba. Laakiin ka hor inta aan ku caawini karno, waxaan u baahanahay inaan ogaano inaad uur leedahay. Fadlan naga soo wac lambarka 1-866-246-4358 (Qalabka Maqalka Fududeeya 1-800-750-0750) isla marka aad ogaato inaad uur leedahay. Waxaynu sameyn doonaa daryeelka gaarka ah ee adiga iyo ilmahaaga u baahan tihiin.

CentAccount™ - Barnaamijka Abaalmarinta

Helida abaalmarin waa wax sahlan! Markaad sameyso xulashooyinka caafimaad, abaal-marin doolar ah ayaa laguugu dari doonaa kaarkaaga abaalmarinta ee CentAccount. Abaalmarinta waxaa lagu daraa qiyaastii laba toddobaad ka dib markaan helno sheegashada dhaqanka caafimaadka. Haddii ay tahay abaalmarintaada koowaad, kaar ayaa boostada laguugu soo diri doonaa. Heyso kaarkaaga ka dib markaad isticmaasho iyo marka aad kasbato abaalmarin dheeraad ah, waxaa lagu darayaa kaarkan.

Kasbo Abaalmarinta adoo dhamaystiraya waxqabadyada Caafimaad qabka ee soo socda:

\$100 - Booqashada daryeelka wanaagsan ee sannadlaha ah we (PCP) (sannad walba; (canug walba oo jira 12- iyo 21 iyo 21 jirada iyo ka weyn)

\$100 - Daryeelka dhameystiran ee sonkorowga ee sanadlaha ah - waa in la buuxiyaa dhammaan waxa soo socda hal mar sannadkiiba: baarista HbA1c, baaritaanka kalyaha, baarista retinopathy (imtixaanka indhaha oo isha oo furan)

\$75 - Tallaalka hargabka (Inta lagu jiro xilliga hargabka, Sebtembar - Abriil da'aha 6 bilood ilaa 5 sano iyo 50 iyo ka weyn)

- Baaritaanka kansarka naaska ee sannadlaha ah (dumarka da'doodu tahay 40 ilaa 69) - \$75,
- Uurka iyo xanaanada ilmaha yar
 - Booqashada dhakhtarka saddexaad ee dhakhtarka uurka - \$ 50 (ugu badnaan \$ 150, NOP ayaa loo baahan yahay)
 - Booqashada dhakhtarka umusha ka dib 21 ilaa 56 maalmood dhalmada ka dib - \$75
 - Buuxi lix booqasho daryeel caafimaad oo wanaagsan oo carruurta ah (maaddaama ay jiraan 8 qorshe WCV) 15 bilood - \$ 100

(Booqashooyinkan waxaa lagu taliyaa 3 ilaa 5 maalmood jir, ka hor 30 maalmood jir, iyo 2, 4, 6, 9, 12 iyo 15 bilood jir.)

Gal koontadaada xubinta ee internetka wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan meesha aad ku isticmaalayso doolarkaaga abaal-marinta ah iyo alaabta lagu iibsano karo kaarkaaga.

Gaadiidka

Buckeye waxay bixisaa caymiska safarka adeegyada ilaa 30 maayl iyo wixii dheer. **Intaa waxaa dheer, Buckeye waxay bixisaa ilaa 30 booqashooyin wareeg safar ah (60 safar oo aadis kaliya ah) oo xubin kasta helayo muddo 12 bilood ah si ay u helaan ballamada daryeel-caafimaad /ilkaha, ballamada WIC, iyo ballamada dib u go'aaminta kiiskaaga ee aad la yeelato shaqaalahaaga ee Waaxda Adeegyada Qoyska iyo Shaqada ee Ohio (Ohio Dept of Job and Family Services – ODJFS).** Xubnaha waxay ka wici karaan Adeegyada Xubnaha si toos ah 48 saacadood (laba maalmood oo shaqo) ka hor Lambarka 1-866-246-4358 si ay u qorsheystaan gaadiid. Haddii gaadiid loogu baahdo balan caafimaad oo deg deg ah, waxaynu diyaarin doonaa qaadid toos ah, oo aan laheyn sugid 48 saacadood (haddii laga xaqiijiyo dhakhtarkaaga).

Waxaad heli kartaa gaadiid – lacag la'aan ah – si aad u gaarto dhammaan ballamada caafimaad oo ay ka mid yihiin:

- Dhakhtarka ilkaha
- Ballamada daryeelka dhalmada
- Booqashada xafiiska daryeelka assaasiga ah
- Tallaalka carruurta
- Ballamada dhakhtarka takhasus laha ah.

- Xarumaha Daryeelka deg dega ah
- Ballamada WIC
- Dib u go'aaminta (waji-ka-waji ah) booqashooyinka kiisaska shaqaalaha/ CDJFS
- Farmashiyaha –booqashada dhakhtarka kadib

Buckeye ma bixiyaan gaadiid adeegyada gurmada degdegga ah. Haddii aad qabto xaalad deg deg ah, wac 911 ama tag meesha ugu dhow ee xaaladda degdegga ah isla markiiba. Haddii aadan hubin sida loo tagi karo qolka gargaarka degdegga ah, wac Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka (PCP) ama Khadkeena Talo-bixinta Kalkaalinta ee 24-saac ah, Khadka Macluumaadka Caafimaadka ee Buckeye lambarka 1-866-246-4358, (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750). Haddii ballanada daryeel-Caafimaad qabka / ilkaha ay tahay mid ka baxsan 15-wareeg oo safar ah (30 safar oo hal dhinac ah) ee halkii xubinba muddo ah 12-bilood, waxaad la xiriiri kartaa ODJFS si aad u hesho caawimaad.

Adeegyada Indhaha

Si aad u ilaaliso caafimaad indhahaaga, Buckeye waxay ku siin faa'iidooyinkan adiga iyo qoyskaaga:

- Buckeye waxay bixisaa baaritaanka indhaha ee sanadka ah ee loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn.
- Muraayada indhaha (muraayado cusub) ayaa la bixiyaa sannad kasta ee loogu talagalay carruurta da'doodu ka yar tahay 21 sano iyo dadka waaweyn ee ah 60 jir iyo ka weyn. Muraayada indhaha waxaa la siiyaa xubnaha da'doodu udhaxeeyso 21 ilaa 59 labadii sanaba mar.
- Buckeye waxay bixin doontaa \$50 sanadkiiba si loogu iibsado caaga-fiiqa indhaha lagashado ee loogu talagalay carruurta da'doodu tahay ilaa 21 jir iyo dadka waa weyn ee da'doodu tahay 60 iyo ka weyn. \$50 labadii sanaba hal mar ee loogu talagalay xubnaha 21 ilaa 59 sano jir.
- Buckeye waxay bixisaa \$50 sanadkiiba loogu talagalay kharashka rakibida caaga-fiiqa indhaha lagashado ee loogu talagalay carruurta da'doodu tahay ilaa 21 jir iyo dadka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 60 sano jir ama ka weyn. Tani waxaa la heli karaa labadii sanaba mar ee loogu talagalay dadka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 21 ilaa 59 jir.
- Gargaarka Caafimaadka (Medicaid) ee Adeega-Lacagta_ah ma daboolo caaga-fiiqa indhaha lagashado. Labadaba caaga-fiiqa indhaha lagashado iyo muraayadaha waxaa laga yaabaa inaan la heli Karin isla sanadkii (ama isla labada sano ee dadka qaangaarka ah ee da'doodu tahay 21 – 59 jir)

Adeega Ilkaha

Buckeye waxay bixisaa faa'iidooyinka daryeelka ilkahaaga:

- Laba baaris iyo nadiifin oo afka ah sanadkiiba.
- Ilko saarida iyo buuxinta.
- Biraha ilkaha ee daboolan dadka da'doodu ka yar tahay 21 jir.
- Ilko galinta qayb ahaan, isku-dhawaynta, taajaynta (waxaa loo baahan yahay oggolaado hore).
- Ma jiraan lacag wadabixin adeegyada ilkaha.

Nasiino

Adeegyada Nasiinada waa adeegyo siiya nasiino mudo-gaaban, oo ku meel gaar ah qof aan lahayn daryeele rasmi ah oo aan mushaar la siin oo xubin ka ah Buckeye oo da'doodu ka yar tahay 21sano iyo kuwa xaqa u le Dakhliga Bulshada ee Dheeraadka ah (Supplemental Security Income - SSI) si ay u taageeraan sidoo kalena u haystaan xiriirka daryeelka assaasiga ah.

Daryeelayaasha waa inay la xiriiraan maamulaha daryeelka xubnaha Buckeye si lagugu qorsheeyo faa'iidooyinkan.

Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye Caafimaad ee 24-ka Saacadood ah

Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye Caafimaad ee 24-ka Saacadood ah waxaa ka shaqeeya Kalkaaliyaal Caafimaad oo Ruqsadeysan oo shaqeeya 24-ka saacadood maalintii, maalin walba ee maalmaha sanadka iyo waa ilahaaga ee macluumaadka caafimaadka.

Kalkaaliyayaasha Caafimaad ee Buckeye waxay wakhti badan siiyaan daryeelka dadka. Hadda waxay diyaar u yihiin oo xiiso u leyihiin inay ku caawiyaan.

Adeegyada hoos ku qoran waxaa laga heli karaa adigoo kala xiriiraya Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye lambarka 1-866-246-4358, (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750):

- Khadka talo bixinta caafimaad
- Maktabadda macluumaadka Caafimaadka
- Ka caawinta go'aaminta meesha aad u tagi lahayd daryeel
- Ka jawaabida su'aalaha ku saabsan caafimaadkaaga
- Talo ku saabsan ilmaha buka
- Macluumaad ku saabsan uurka
- Talo ku saabsan inta daawo ee aad siinayso ilmahaaga

Ma hubid inaad u baahan tahay inaad tagtid qolka gargaarka degdegga ah ama Xarunta Daryeelka deg dega ah? Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in aadan hubin haddii aad u baahan tahay inaad tagtid Qolka Gargaarka Degdegga ah ama Xarunta Daryeelka Degdegga ah. Wac Khadka Tala-Bixinta kalkaaliye Caafimaad. Kalkaaliye ayaa kaa caawin kara in aad ogaato haddii ay tahay xaalad degdeg ah ama haddii aad sugi kartid. Adeegyada degdegga waa adeegyada dhibaatooyinka caafimaad ee aadka halis u ah oo ay qasab tahay isla markiiba dhakhtar inuu ku daweeyeyo.

Barnaamijka Neefta

Haddii aad leedahay ilmo qaba neef, waxaynu leenahay Barnaamijka Maaraynta Neefta oo kaa caawin kara inaad si sii fiican u maareeyso cudurka neefta ee ilmahaaga haya. Neefta waa cudur sababa in ay kugu adkaato in aad neefsato. Dadka qaba cudurka neefta:

- Badanaa waxaa dhibta neefsashada
- Ciriiri inay ka dareemaan xabadka
- Waxay sameeyaan cod hiinraag ah markii ay neefsanayaan
- Inay in badan qufacaan, gaar ahaan habeenkii

Iyaadoo neefta aan la daaweyn Karin, waa la xakamayn karaa. Haddii ilmahaagu qabo neef, barnaamijkeena ayaa kaa caawin doona:

- In la aqoonsado waxyaabaha keena weerarka neefta
- Ogow markii weerarka neeftu ay bilowga tahay si sida ugu dhakhsaha badani looga hortago in dhibaatooyin daran ay dhacaan.
- Qaado daawada saxda ah iyo qalabka loogu talagalay si looga hortago
- Booqo dhakhtarka ilmahaaga si loo daweeyo

Fadlan ka wac Maareeyaha Daryeelka Neefta 1-866-246-4359 (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750) haddii ilmahaagu qabo neef. Hubi inaad wacdo haddii ilmahaagu:

- Isbitaalka loo jiiifiyay cudurka neefta inta lagu jiray sanadkii la soo dhaafay
- In neef loo dhigay Qolka Gargaarka degdegga ah laba jeer ama in ka badan lixdii bilood ee la soo dhaafay
- U tagay cudurka neefta xafiiska dhakhtarka saddex jeer ama in ka badan lixdii bilood ee la soo dhaafay
- Haddi uu qaato daawada neefta ee afka laga qaato

Isku Xirrida Xubnaha

Waxaynu leenahay barnaamij gaar ah oo kugu xiriirinaya adeegyada daryeelka caafimaadka iyo bulshada oo tayo leh. Waxaa loo yaqaan Isku Xirrida Xubnaha. Wakiilada Ururka Samafalka ee Isku Xirrida Xubnaha ayaa kaala hadli doona telefoonka marka aad wacdo lambarka 1-866-246-4358 (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750), waxay kugu soo dirayaan warbixin boostada, iyo waxay booqan gurigaaga haddii aad jeclaan lahayd in ay yimaadaan.

Waxay ku farxi doonaan inay kula hadlaan wax ku saabsan:

- Sida loo doorto dhakhtarka
- Sida dhakhatrka la iskaga bedelo
- Adeegyada daryeelka caafimaadka ee caymiska
- Sida loo isticmaalo adeegyada daryeelka caafimaadka
- Sida loo helo talo caafimaad marka aadan heli karin dhakhtarkaaga
- Sharxidda farqiga u ah ee daryeelka degdegga ah iyo kuwa aan degdegga ahayn
- Sida loogu noolaado nolol caafimaad leh
- Sida loo helo tallaalada iyo baaritaanka caafimaadka
- Dhibaato kasta ee kale adeeg caafimaadood laga yaabo inaad qabto

Wakiilada Haya ee kale adeeg calskuxirrida Xubnaha sidoo kale kaa caawin karaan inay kugu xiraan adeegyada bulshadahaddii aad u baahan tahay cunto, guri, dhar, adeegyada korontada, iwm. Si aad ula xiriirto Iskuxirrida Xubnaha wac 1-866-246-4358 (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750).

TEXT4BABY

Haddii aad uur leedahay ama aad heysato ilmo ka yar hal sano jir, Buckeye waxay kugu dhiirigelineysaa inaad kaqaybqaadato TEXT4BABY adeeg LACAG LA'AAN AH oo kaa caawinaya isu diyaarinta hooyanimada.

TEXT4BABY waxay kuu soo diri doontaa xusuusinta ballanta, macluumaadka shakhsiyeed ee ku saabsan daryeelka dhalmada ka hor, koritaanka ilmaha, calaamadaha foosha, naasnuujinta, nafaqada iyo in kaloo badan telefoonkaaga gacanta. Way sahlan tahay in la is qoro iyo farriimaha waa lacag la'aan.

Si aad isku qorto, booqo: BuckeyeHealthPlan.com/text-4-baby. Waxaad joojin kartaa adeegga adigoo u soo qoraya STOP (ALTO afka Isbanishka) lambarka 511411. Si aad wax dheeraad ah u ogaatid fadlan booqo 11.text4baby.org.

Kharashka xogta ee caadiga ah ayaa laga yaabaa in lagu soo dalaco haddii aad gasho xiriirarka (links) ku jira farriimaha lacag la'aanta ah. Macluumaadka waxaa laga yaabaa in lagu heli karin dhamaan shirkadaha telefoonada. Si aad u hesho caawin u dir qoraalka ereyga HELP lambarka 511411 ama email u dir info@text4baby.org.

Xasuusinta Daryeelka Caafimaadka

Buckeye wuxuu xubnaha u diraa xilliyada qaarkood kaararka boostada iyo fariimaha qoraalka ah si loo xusuusiyo jadwal ballamo caafimaad oo muhiimka ah ee waxyaabaha sida tallaalada (durriinka), booqashada dhakhtarka ilkaha, iyo raajada iyo baaritaanada suntan dhiiga.

Warsidaha Xubnaha

Buckeye waxay u dirtaa xubnaha labbo warside ee rubuclaha ah, Dhaqdhaqaaq Caafimaad qabka (Healthy Moves),. Wargeysyadan waxaa ka mid ah macluumaad ku saabsan faa'iidooyinka barnaamijka, iyo sidoo kale maqaallo ku saabsan mawduucyo caafimaad iyo nabadqabidda.

Maaraynta Daryeelka

Buckeye waxay bixisaa adeegyada maaraynta daryeelka, ee la siiyo carruurta iyo dadka waaweyn ee u baahan daryeel caafimaad oo gaar ah. **Barnaamijkeena maaraynta daryeelka waxa uu ka caawiyaa xubnaha inay wax badan ka bartaan waxii ku saabsan walaacyada caafimaadkooda sida:**

- Neefta
- Horumarka iyo/ama garashada qofka oo aad u liidata iyo / ama xaddidan
- Sonkorowga
- Xubnaha lagu talaalo jirka

- Halista aadka u saraysa ama ku xadgudubka maandooriyaha/daroogada kharashka badan
- Cudurka halbowlaha wadnaha (CAD)
- Isbitaalka Seexinta joogto ah ama booqashada qaybta deg dega
- Cabirka dhiiga oo kordha (cadaadiska dhiiga oo sareeya)
- Cudurka Xira Sanbabka ee raagay (COPD)
- Haweenka uurka leh ee halista ku jira
- Ilmaha dhiciska ku dhasha
- Cudurka aaydhiska (HIV/AIDS)
- Carruurta leh baahida daryeelka caafimaadka ee gaarka ah
- Cudurada dhimirka aadka u daran

Caafimaadka Maskaxda iyo Habdhaqanka

- Fadhi la talin shakhsiyeed, koox iyo qoys ahaan ah oo loogu talagalay dhibaatooyinka maskaxda, caafimaadka dabecadda iyo cilladaha isticmaalka maandooriyaha/daroogada.
- Baaritaanka cilmi nafsiga iyo koritaanka.
- Maaraynta Dawooyinka.
- Daaweynta Electroconvulsive (ECT).

Barnaamijka waxaa loogu talagalay in maareeyayaasha daryeelka ay xubnaha kala shaqeeyaan si looga caawiyo inay hagaajiyaan ama joogteeyaan caafimaad fiican, iyo gacan ka siinta qorshaynta adeegyada ay u baahan karaan si ay u maareeyaan caafimaadkooda. Ujeedada barnaamijka waa in aan si wada jir ah uga shaqeyno horumarinta qorshe daryeel si looga caawiyo xubnaheena inay noqdaan kuwo u madax banaan in ay fuliyaan baahida daryeelkooda caafimaad. Fadlan ka soo wac waaxda Adeegyada Xubnaha ee Buckeye 1-866-246-4358 (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750) haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Daryeelka Buckeye, barnaamijkena maaraynta daryeelka.

Inkastoo Buckeye ay siiso xubnaha ka tirsan adeegyo maaraynta daryeelka, waxaan ognahay in qaar ka mid ah xubnaha ay jeclaan lahaayen in aysan ka qaybgalin. Qaar ka mid ah xubnaha si gaar ah loo aqoonsaday, Buckeye waxay siin doontaa hab aad uga bixi karto maamulka daryeelka. Haddii aad doorato in aadan ka qayb galin barnaamijkeena Maamulka daryeelka, waa diidi kartaa ka qaybgalidda waqtigii aad rabto adigoo ogaysiinaya maamulaja daryeelka.

Marka aad tahay bukaan isbitaalka jiifa, haddii aad awoodo inay dad kusoo boqdaan, kalkaaliyayaashena ama shaqaalaha bulshada ayaa kugu imaan kara qolka isbitaalka si ay ku soo booqdan ayna kaala hadlaan baahida qorshaha bixitaanka isbitaalka, waxay ka jawaabi doonaan wixii su'aalo ah ee aad qabtid ee ku saabsan faa'iidooyinka iyo adeegyada lagu siinayo, iyo waxay ku siin doonaan macluumaad ku saabsan barnaamijkeena maamulka daryeelka.

Shaqaalahena mar walba waxay marka ugu horeysa arki doonaan shaqaalaha isbitaalka ka hor inta aysan soo galin qolka si ay u hubiyaan inay tahay waqti habboon in aan ku soo booqan karno.

Intaas waxa dheer:

- Shaqaalaha Buckeye, oo ay ku jiraan kalkaaliyayaasha, maamulayaasha daryeelka, iyo shaqaalaha samafalka waxay la xiriiri karaan mid ka mid ah xubnehena haddii uu dhakhtar codsaday wicitaan oo taleefan ah, haddii xubin naga mid ah codsaday wicitaan oo taleefan ah, ama haddii Buckeye uu dareensan yahay in adeegyada maamulka daryeelka uu yahay mid waxtar u leh in mid ka mid ah xubinteena.
- Shaqaalaha Buckeye waxay weydiin karaan Su'aalo xubin naga mid ah ah si ay u helaan macluumaad dheeraad oo ku saabsan xaaladiisa/deeda caafimaad.
- Shaqaalaha Buckeye waxay bixin doonaan macluumaad ka caawinaya in xubin naga mid ah fahmaan sida loo daryeelo isaga / iyada is iyo sida loo helo adeegyada (ay ka mid yihiin ilaha dhaqaale ee degaanka)

- Shaqaalaha Buckeye waxay la hadli doonaa Bixyaha Adeega caafimaadka iyo adeeg bixiyaasha kale ee xubnaha ay ka tirsan yihiin si loo qaban qaabiyo daryeelka.
- Xubnaha waa in ay soo wacan waaxda Adeegyada Xubnaha Buckeye ee 1-866-246- 4358 (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750) haddii ay qabaan wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyada maaraynta daryeelka ama haddii ay dareemayaan in ay ka faa'iidi doonto adeegyada maamulka daryeelka.

Adeegyada Aysan Daboolin Buckeye ama Gargaarka Caafimaadka Ohio

Buckeye ma bixin doonto adeegyada ama sahayda la helay iyada oo la raacin tilmaamaha ku yaal buugan. Buckeye ma bixin doonto adeegyada soo socda ee uusan daboolin Gargaarka caafimaadka:

- Rididda ilmaha marka laga reebo xaalad kufsi ee la soo sheegay, ka timid dad isla dhashay ama marka ay jirto baahi caafimaad si loo badbaadiyo nolosha hooyada
- Adeegyada Daawaynta Cirbadaha jirka la geliyo iyo Dhaq-dhaqaaqa maskaxda (Biofeedbacks)
- Dhammaan adeegyada ama agabka aan caafimaad ahaan loo baahnayn
- Adeegyada lagu caawiyo isdilida, oo lagu qeexay inay yihiin adeegyada ujeedadu tahay inay keenaan, ama caawinayaan, dhimashada qofka
- Alaabta raaxada ee isbitaalka (tusaale ahaan, TV ama taleefon)
- Adeegyada tijaabooyinka iyo hababka qaliinka, oo ay ka mid tahay daawooyinka iyo qalabka, oo aan lagu xusin Gargaarka caafimaadka oo aan ahayn sida uu qabo heerka caadada u ah dhaqanka macaamiisha.
- Adeegyada Dhalmo la'aan oo lab ah ama dhadig ah, oo ay ku jirto dib u habeeynta dhalmo soo celinta iska xiriida kadib.
- Ilaalinta bukkaan jiiifka isbitaalka
- Daaweynta bukaan- jiiifka si looga joojiyo isticmaalka daroogada iyo / ama aalkolo (adeegyada daawaynta aalkolada bukaan-jiiifka isbitaalka guud waa la heli karaa)
- Baaritaanka waalidnimo
- Qallinka la isku qurxiyo oo caafimaad ahaan laga maarmo
- Adeegyada lagu daaweynayo cayilka haddii aan la go'aamin in caafimaad ahaan loo baahan yahay
- Adeegyada si loo helo sababta dhimashada (Baarista maydka)
- La talinta galmada ama guurka
- Dhalma iska xirrida ikhtiyaariga ah haddii ay da'da ka yar tahay 21 sano ama si sharci ah aan u awoodi karin in uu ogolaado hanaanka qaliinka
- Tani ma ahan liis dhamaystiran ee adeegyada aysan daboolin caymiska Gargaarka Caafimaadka (Medicaid) ama Buckeye. Haddii aad qabto su'aal ku saabsan in adeeg uu caymis daboolayo, fadlan ka soo wac waaxda Adeegyada Xubnaha lambarka 1-866-246-4358.

CAYMISKA DARYEELKA ASSAASIGA AH Doorashada Caymiska Daryeelka Assaasiga Ah (PCP)

Xubin kasta oo ka mid ah Buckeye waa inuu ka doortaa Caymiska Daryeelka Assaasiga ah liiska Bixiyaha Caafimaadka ee Buckeye. Caymiska Daryeelka Assaasiga ah waa dhakhtar gooni ah, kooxda dhakhatirta guud, kalkaalisada sare ee guud ama koox kalkaaliyasha caafimaadka guud oo loo tababaray daawooyinka qoyska (dhakhtarka guud), cudurada gudaha, ama dhakhtarka carruurta.

Caymiska Daryeelka Assaasiga ah wuu kula shaqayn doona si loo toosiyo daryeelka caafimaadkaaga. Caymiska Daryeelka Assaasiga ah wuxuu samayn doonaa baaritaanada iyo tallaalka iyo wuxuu kaa daawayn doonaa inta badan baahidaada caafimaad ee joogtada ah. Haddii loo baahdo, Caymiska Daryeelka Assaasiga ah wuxuu kuu diri doonaa dhakhaatiir kale (dhakhaatiirta takhasuska leh) ama ku jiiifin doonaan isbitaalka.

Waxaad kula xiriiri kartaa Caymiska Daryeelka Assaasiga ah adiga oo wacaya xafiiska Caymiska Daryeelka Assaasiga ah. Magaca iyo lambarka telefoonka ee Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah waxay ku qoran yihiin yihiin kaarkaaga aqoonsiga ee Buckeye.

BEDDELLIDA BIXIYAHAAGA DARYEELKA ASSAASIGA AH

Haddii aad rabto in aad beddesho Caymiska Daryeelkaaga Assaasiga ah sabab kasta ha ahaatee, waa in aad marka hore soo wacdaa waaxda Adeegyada Xubnaha si aad u weydiisato beddelida. Waxaad sidoo kale ka beddeli kartaa Bixiyahaaga Daryeelkaaga Assaasiga ah internetka/online ahaan portalka xubnaha ammaanka ah. Xubnaha waxay beddeli karaa Bixiyahooda Daryeelka Assaasiga ah bil walba. Fadlan

ogsoonow, wixii isbeddel ah ee Caymiska Daryeelka Assaasiga ah ee la doortay inta lagu jiro bisha kowaad ee xubinnimada waxay hirgeli doontaa taariikhda la codsaday in la beddelo Caymiska Daryeelka Assaasiga ah. Haddii aad codsato beddelida Caymiska Daryeelka Assaasiga ah ka dib bisha koowaad ee xubinnimadaada, isbeddelka wuxu hirgeli doonaa maalinta koowaad ee bisha soo socota.

Buckeye waxay kuu soo diri doonaan warqad iyo kaar aqoonsi cusub si aan kuugu sheegno in Bixiyahaaga Daryeelkaaga Assaasiga ah la beddelay iyo taariikhda aad bilaabi karto inaad aragto Caymiska Daryeelka Assaasiga ah ee cusub.

Si aad u hesho magacyada Bixiyayaasha Caafimaadka Assaasiga ah ee Buckeye, waxaad eegi kartaa buuga bixiyayaasha caafimaadka, ama barteena internetka www.buckeyehealthplan.com, ama waxaad ka waci kartaa Waaxda Adeegyada Xubnaha Buckeye lambarka 1-866-246-4358 (qalabka fududeya maqalka 1-800-750-0750) wixii caawimaad ah ee aad u baahan tahay.

DARYEELKA DEGDEGGA AH

Daryeelka Dibada-Deegaanka, Saacadaha Shaqada Kadib, iyo Degdegga Ah

Daryeelka Dibada-Deegaanka, Saacadaha Shaqada Kadib

Haddii xafiiska Bixiyahaaga Caafimaadka Assaasiga ah uu xiran yahay ama aad safar ugu maqan tahay meel kasta oo dalka Mareykanka ka mid ah, oo ay ku qabsato dhibaato aan xaalad degdeg ah ahayn, ka wac Bixiyahaaga Caafimaadka Assaasiga ah ee Buckeye lambarka taleefanka ku qoran kaarkaaga aqoonsiga. Waxaad kaloo ka wici kartaa Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye 24 saacadood maalintii, todoba maalmood todobbaadkii talefoonka lacag la'aanta ah 1-866-246-4358, (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750). Kalkaaliso Caafimaad ayaa ka jawaabi doonta kaana caawin doonta in aad go'aansato wixii aad samayn laheed.

Daryeelka caafimaadka waxaa laga heli karaa Bixiyayaasha Caafimaadka Buckeye 24 saacadood maalintii, todoba maalmood todobbaadkii. Ka dib saacadaha shaqada, telefoonka Bixiyahaaga Caafimaadka waxaa ka jawaabi doona mishiinka codka lagu duubo ama mishiinka codka oo ku siin doona tilmaamo gaar ah. Hubi inaad raacdo tilmaamaha mashiinka. Adeega codka lagu reebo waxay sameyn doonaan in Bixiyahaaga Caafimaadka Assaasiga ah uu ku soo waco ama dhakhtar u shaqeeya Bixiyahaaga Caafimaadka uu dib kuu soo waco. U sheeg inaad tahay xubin ka mid ah Buckeye una sharax dhibaataada. Waxay kuu sheegi doonaan wixii aad samayn laheed. Waxaad sidoo kale booqan kartaa Xarunta Caafimaadka Degdegga ah ee qandaraas kula jirta Buckeye ee ku qoran Liiska Bixiyayaasha caafimaadka ama boggeena internetka ee www.buckeyehealthplan.com, ama waxaad ka wici kartaa Khadka Tali-Bixinta Kalkaaliye telefoonka lacag la'aanta ah 1-866-246-4358, (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750).

ADEEGYADA DEGDEGGA AH

Adeegyada degdegga ahi waa daaweynta caafimaad ee loogu baahan yahay dhaawac ama cudur oo ay qasab tahay in isla markiiba uu daweyno dhakhtar. Waynu daboolnaa kharashka daryeelka xaaladaha degdegga ah ee labada gudaha iyo dibada gobolka aad ku nooshahay, meel walba ee wadanka maraykanka ka mid ah.

Qaar ka mid ah adeegyada gurmada loo baahan yahay waxaa ka mid ah:

- Xabad xanun
- sumoobid (sunta)
- Jabka gacan ama lug
- Dhiig bax daran
- Gubasho daran
- Neefta oo u yarata si lama filaan ah ama Neefsashada oo dhibta
- Dhicis/uurka uu la socda dhigiga ka yimaada xubinta taranka

Qasab kuguma ahan in aad soo wacdo Buckeye si aad u waydiisato ogolaansho inta aadan helin adeega degdegga ah. Haddii ay ku haysato xaalad degdeg ah, wac 911 ama tag meesha KUUGU DHOW ee qolka gargaarka degdegga ah (ER) ama meel kale oo kugu haboon. Haddii aadan hubin in aad u baahan tahay in aad tagto qolka gargaarka degdegga ah, waxaad wacdaa Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah ama ka wac Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye ee Buckeye laambarka 1-866-246-4358, (qalabka maqalka fududeya 1-800-750-0750). Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah ama Khadka Tala-Bixinta Kalkaaliye ee Buckeye waxay kaala hadli karaan wixii ku saabsan dhibaataada caafimaad iyo inay talo kaa siiyaan wixii aad samayn lahayd.

Fadlan la soco in aad isu-gudbin karto Xarunta Daryeelka Degdegga ah ee Buckeye saacadaha shaqada kadib hadii ay xaruntaa furan tahay wakhtigaas.

Xusuusnow, haddii aad u baahan tahay adeegyada degdegga ah:

- Tag qolka xaaladaha degdegga ah ee isbitaalka kuugu dhaw ama meel kale oo ku haboon. Hubi in aad u sheegto in aad tahay xubin ka mid ah Buckeye iyo in aad tusto kaarkaaga aqoonsiga.
- Haddii bixiyaha Caafimaadka ee kaa daawaynaya xaalada degdegga ah uu wax ka qabto xaalada degdegga ah laakiinse ay u maleeyaan in aad u baahan tahay daryeel caafimaad ee kale si loo daaweeyo dhibaataada keentay xaalada degdegga ah, Bixiyaha caafimaadka waa inuu soo wacaa Buckeye.
- Soo wac Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah ee Buckeye (ama waydiiso isbitaalka inay soo wacaa Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah) sida ugu dhaqsiiyaha badan. Taasi waxay ogeysiinaysaa Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah daryeelka aad heshay. Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah wuxuu markaas la wareegi karaa isku duwidda daryeelkaaga. Waa inaad la xiriirtaa Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah 24 saacadood gudahood si ay u qabanqaabiyaan daryeel dabagal ah oo aad ka hesho caymisyada ka qayb ah ee goobta adeega.
- Haddii lagu jifiyo isbitaalka, fadlan hubi in la waco Buckeye 24 saacadood gudahooda.

DAAWOYINKA DHAKHTARKU UU QORO

Iyadoo Buckeye ay daboolayso dhammaan daawooyinka caafimaad ee lagama maarmaanka ah ee Gargaarka Caafimaad, waxaan isticmaalnaa liiska daawooyinka aan doorbidayno (PDL). Kuwani waa daawooyinka aan doorbidno in uu qoro Bixiyahaaga. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u baahano in Bixiyahaaga uu noo soo gudbiyo macluumaad (codsi oggolaansho hore ah) si ay u sharaxno sababta daawo gaar ah iyo / ama qiyaas gaar ah oo daawo ah loogu baahan yahay. Waa qasab in aan ansixin codsiga ka hor inta aadan helin daawada. Sababaha aan u codsan karno oggolaansho hore ee daawada waxaa ka mid ah:

- Waxaa jiro daawo kale oo la mid ah oo guud ama farmashiyaha laga heli karo.
- Daawada si qaldan ayaa loo isticmaali karaa / ama lagu xadgudbi karaa.
- Waxaa jira daawooyin kale oo ay tahay in marka hore la isku dayo oo leh halisyo ka yar.

Daawooyinka qaarkood ayaa sidoo kale laga yaabaa in tiradooda (cadadkooda) la xadido iyo daawooyinka qaarkood weligood lama geliyo caymis, sida daawooyinka loo isticmaalo cayil luminta.

Haddii aanan ansixin codsi oggolaansho hore ee daawo, waxaan kuu soo diri doonaa macluumaad ku saabsan sida aad uga dacwoon kari laheed go'aankeena iyo xaqa aad u leedahay dhagaysi dawladeed.

Waxaad wici kartaa adeega xubnaha si aad u codsatid macluumaad ku saabsan daawooyinka aan doorbidno in la qoro (PDL) iyo daawooyinka u baahan oggolaansho hore. Sidoo kale waxaad ka eegi kartaa boggeena internetka ee www.buckeyehealthplan.com. Fadlan la soco in liiska daawooyinka aan doorbidno in la qoro (PDL) iyo liiska daawooyinka u baahan oggolaansho hore ay is beddeli karaan sidaa awgeed waxaa muhiim kuu ah adiga iyo / ama bixiyahaaga in aad iska hubiso macluumaadkan marka aad u baahan tahay inaad buuxiso / dib u dalbato daawo.

Haddii aadan heli Karin farmashiye leh ansixin-Buckeye ee u dhow gurigaaga, waxaa jira fursado kale oo lagu heli karo daawooyinkaaga. Buckeye waxay la shaqaysaa shabakada farmashiyado ee sidoo kale haysta adeegga boostada oo la heli karo. Waxaan ku bixinnaa saddex bilood oo ah daawooyinka dayactirka (daawooyinka loo isticmaalo daaweynta xaaladaha ama cuddurada muddada dheer) boostada. Liiska buuxa ee daawooyinka la daboolay ee adeegyadan iyo inaad wax badan ka barato daawooyinka daboolan iyo kuwa u baahan oggolaansho hore booqo BuckeyeHealthPlan.com.

Gobolka Ohio wuxuu u fasaxaa Bixiyayaasha Daryeelka Caafimaadka in ay sameeyaan iyo hirgeliyaan barnaamijyo si ay u caawiyaan xubnaha qaarkood ee qaata daawooyinka oo aan caafimaad ahaan lagama maarmaanka ahayn in la dhisaan oo joogteeyaan xiriir bixiyahooda iyo / ama farmashiyaha si la isku duwo daawaynta.

Xubnaha isku qoray barnaamijka Qorshaha Adeegyada Isku Duwan ee Buckeye (CSP) waxay lahaan doonaan xaddidaad ah dhakhtarada iyo farmashiyada ay isticmaali karaan inay ka helaan daawooyinka la kontoroolo, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah. Xubnaha waxay sidoo kale awoodi doonaan inad beddelaan bixiyayaasha loo xil saaray sida waafaqsan siyaasada.

CABASHOYINKA (DACWADA)

Cabashooyinka (Dacwada)

Sida Loo Ogaysiiyo Buckeye Haddii Aadan Ku Faraxsanayn Ama Aadan Ku Raacsaneyn Go'aan Aan Gaarnay.

Haddii aadan ku faraxsanayn wax ala wixii ku saabsan Buckeye ama bixiyeyaasheeda waa in aad noola soo xiriirtaa sida ugu dhaqsaha badan. Tan waxaa ka mid ah haddii aadan ku raacsaneyn go'aan aan gaarnay. Adiga, ama qof aad rabto in aad u hadasho ayaa nala soo xiriiri kara. Haddii aad rabto in qof kuu hadlo, waxaad u baahan doontaa inaad nala soo socodsiiiso taasi. Buckeye waxay doonaysaa in aad nala soo xiriirto si aan kuu caawino. Si aad noola soo xiriirto waxaad sameyn kartaa inaad:

- Ka wacdo waaxda Adeegyada Xubnaha lambarka 1-866-246-4358 (qalabka maqalka fududeeya 1-800-750-0750), ama
- Buuxiso foomka la socda buugyaraha xubinaha, ama
- Wacdo waaxda Adeegyada Xubnaha si aad u codsato inay kuu soo diraan foom, ama
- Booqato barteena internetka www.buckeyehealthplan.com, ama
- U qorto warqad adigoo noo sheegaya waxa aadan ku faraxsanayn. Hubi in aad warqadda kusoo qorto magacaaga koowaad iyo kan dambe, lambarka ku qoran xagga hore ee kaarkaaga aqoonsiga ee xubinimada Buckeye, iyo cinwaankaaga iyo lambarka taleefonkaaga si aan u awoodno inaankuula soo xiriirno, hadii loo baahdo.

Sidoo kale waa inaad soo dirtaa wixii warbixin ah oo caawinaysa in aad sharaxdo dhibaataada, sida taariikhda iyo meesha dhibaataada kadhacday.

Buckeye Health Plan

Appeals/Grievance Coordinator 4349
Easton Way, Suite 300
Columbus, OH 43219

Buckeye waxay kusoo diri doontaa qoraal haddii aan go'aansano:

- diidmada codsigaaga ah in aan bixino adeeg lagu qabtay;
- dhimista, xayiridda ama joojinta adeegyada ka hor inta aadan helin dhammaan adeegyada la ansixiyey; ama
- diidmada lacag bixinta adeeg aad heshay oo aysan daboolin Buckeye

Waxa kale oo aan kuu soo diri doonaa qoraal haddii aynan ku guuleysan weynay inaan gaarno go'aan wakhti haboon. Tusaale ahaan:

- aan ka gaaro go'aan in aan oggolaano iyo in kale codsiga in lagu daboolo, ama
- aan ku siino jawaab ku saabsan wax aad noo sheegtay in aadan ku faraxsanayn

Haddii aadan nagu raacsaneyn go'aanka / ficilka ku qoran waraaqda, oo aad nala soo xiriirto 60 maalmood gudahood ah si aad noo weydiiso in aan beddelno go'aankena / tallaabadeena, taasi waxaa loo yaqaanaa rafcaan. Muddada 60 maalmood waxay bilaabanaysa maalinta ka dambaysa taariikhda dirista warqadda. Illaa haddii aanan kuu sheegno taariikh ka duwan, waxaan kugu siin doonaa jawaabta racfaankaaga qoraal ahaan 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda aad nala soo xiriirtay. Haddii aanan beddelin go'aankeena ama talaabadeena taas oo ka dhalatay racfaankaaga, waxaynu kuu sheegi doonaa inaad xaq u leedahay inaad codsato dhageysi dowladeed. Waxaad kaliya codsan kartaa dhageysi dowladeed kadib markaad soo maro nidaamka racfaanka ee Buckeye.

Haddii aan go'aansano in la yareeyo, la xaddido ama la joojiyo adeegyada ka hor inta aadan helin dhammaan adeegyada la ansixiyey, warqadadu waxay kuu sheegi doontaa sida aad u sii wadan laheed helitaanka adeegyada haddii aad doorato iyo marka laga yaabo in aad bixiso lacagta adeegyada.

Cabashooyinka

Hadii aad nala soo xiriirto sababtu na tahay inaad ku faraxsanayn wixii walba ee ku saabsan Buckeye ama mid ka mid ah bixiyeyaasheena, tani waxaa lagu magacaabaa cabasho. Buckeye waxay kugu siin doontaa jawaab cabashadaada talefoonka (ama warqad boosto haddii aan kugu heli wayno telefoon) wakhtiyada soo socda:

- 2 maalmood oo shaqo cabashooyinka ku saabsan in aadan awoodin helida daryeel caafimaad
- 30 maalmood dhammaan cabashooyinka kale marka laga reebo cabashooyinka ku saabsan helitaanka biilka daryeelka aad heshay
- 60 maalmood cabashooyinka ku saabsan helitaanka biilka daryeelka aad heshay

Waxa kale oo aad xaq u leedahay in aad mar kasta fayl gareyso/xareyso cabasho adigoo la xiriiraya:

Ohio Department of Medicaid

Bureau of Managed Care P.O.
Box 182709
Columbus, Ohio 43218-2709
1-800-605-3040 or 1-800-324-8680 TTY: 1-800-292-3572

Ohio Department of Insurance

50 W. Town Street, 3rd Floor, Suite 300
Columbus, Ohio 43215
1-800-686-1526

Dhagaysiga Dowlada

Dhageysiga Dowlada waa kulan adiga ama wakiilkaaga la oggol yahay, la leedihiin qof ka socda Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Degmada, qof ka socda Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye, iyo sarkaal dhageysi oo ka socda Xafiiska Dhagaysiga Dowlada ee Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Ohio (ODJFS). Kulankan, waxaad ku sharxi doontaa sababta aad u maleyneyso in qorshaha Caafimaadka ee Buckeye aysan sameynin go'aanka saxda ah iyo Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye ayaa sharxi doonta sababaha go'aanka loo gaaray. Sarkaalka dhageysiga ayaa dhageysan doona ka dibna go'aan ka gaaraya cidda saxda ah iyada oo ku saleysan xeerarka iyo macluumaadka la siiyey.

Buckeye ayaa kula soo socodsiiin doonta xaq aad u leedahay in aad codsato dhageysi dowlad marka:

- la gaaro go'aan lagu diidayo adeegyada
- go'aan laga gaaro, in la yareeyo, la xaddido ama la joojiyo adeegyada inta ka hor dhamaan adeegyada la oggolaaday aan la helin
- bixiye ayaa biil kuu soo diraya sababtoo ah Buckeye ayaa diiday bixinta adeegaas
- go'aan ayaa la gaaray in lagu soo jeediyay in la iska diiwan geliyo ama la sii waddo is diiwaan gelinta barnaamijka Buckeye ee Maaraynta daawooyinka la kontoroolay iyo Xubnaha (CSMM) .
- Go'aan ayaa la gaaray lagu diidayo codsigaaga in aad beddesho bixiyahaaga Maaraynta daawooyinka la kontoroolay iyo Xubnaha (CSMM) ee Buckeye.

Haddii aad rabto dhagaysi dawladeed, waa in aad adiga ama wakiilkaaga la oggol yahay codsataan dhageysiga 120 maalmood gudahood. Muddada 120-ka maalmood waxay bilaabanaysaa maalinta ka dambaysa taariikhda dirista foomka dhageysiga. Haddii uu racfaankaagu ku saabsan yahay go'aan ah yareen, xaddidid, ama joojin ah adeegyada inta ka hor helida dhammaan adeegyada la ansixiyay, warqadaada waxay kuu sheegi doontaa sida aad u sii wadan karto helida adeegyada haddii aad doorato iyo marka ay tahay inaad bixiso lacagta adeegyadaa. Haddii aynu kuu soo jeedino inaad isku qorto Barnaamijka Adeegyada Isku Duwan iyo aad doorato inaad codsato dhageysi dowlad muddo gudaheeda ah 15 maalmood laga bilaabo taariikhda lagu soo diray foomka, kuguma qori doono barnaamijka illaa dhageysiga laga gaaro go'aan.

Go'aamada maqalka dowladda waxaa sida caadiga ah lasoo saaraa wax aan ka badnayn 70 maalmood ka dib marka codsiga la helo. Hasa ahaatee, haddii uu Caymiska Daryeelka Caafimaadka ama Xafiiska Dhagaysiga Dowlada go'aansado in xaalada caafimaad ay buuxineyso shuruudaha in go'aanka degdeg loo qaato, Go'aanka waxaa la soo saari doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee loo baahan yahay, balse aan ka danbeyn 3 maalmood oo shaqo ah kadib marka codsiga la helo. Go'aamada Degdegga ah waxaa loogu tala galay xaaladaha marka go'aan qaadashada wakhtiga caadiga ah uu si wayn halis u galin karo noloshada ama caafimaadkaaga ama awoodda si aad u gaarto, joogteeyso ama dib u hesho waxqabad buuxa.

Si aad u codsato dhageysi waxaad saxiixi kartaa oo kusoo dir foomka dhagaysiga dacwada dowlada cinwaanka ama lambarka fax-ka ku qoran foomka, ka wac Xafiiska Dhageysiyada Dowlada 1-866-635-3748, ama kusoo gudbi codsigaaga e-mailka bsh@jfs.ohio.gov. Dhagaysiga dowlada waa kulan aad la yeelato qof ka socda Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Degmada, qof ka socda Buckeye iyo sarkaal dhagaysiga dacwadaha oo ka socda Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Ohio. Buckeye ayaa sharxi doonta sababta aynu go'aanka u gaarnay iyo adigana waxaad sheegi doontaa sababta aad u malaynayso in aan sameynay go'aan qalad ah. Sarkaalka dhagaysigu wuu dhagaysan doonaa ka dibna go'aamin doona cidii saxsan isagoo go'aanka ku salaynaya macluumaadka la siiyay iyo haddii aan raacnay xeerarka iyo haddii kale. Haddii aad rabto macluumaad ku saabsan adeegyada sharciga ee lacag la'aanta ah, laakiinse aadan aqoonin lambarka xafiiska gargaarka sharciga ee deegaankaaga, waxaad ka wici kartaa Ururka Adeegyada Garyaqaanada Gobolka ee Ohio 1-800-589-5888, si aad u hesho lambarka gudaha.

Foomka Cabashooyinka/Racfaanada

Haddii aad rabtid inaad fayl gareyso/xareyso cabasho/racfaan, fadlan la xiriir Adeegyada Xubnaha 1-866-246-4358 (qalabka maqalka fududeeya 1-800-750-0750). Haddii aadan heli karin telefoon, waxaad buuxin kartaa foomkan ama u qori kartaa warqad oo ay ku jiraan macluumaadka hoos lagaga codsaday. Foomka ama warqada oo dhameystiran waa in loo soo diraa:

Buckeye Health Plan
Appeals/Grievance Coordinator
4349 Easton Way, Suite 300
Columbus, OH 43219

Ama fax ku soo dir lambarka 1-866-719-5404 sababta cabashada keentay kadib.

Fadlan ogow: Waa inaad hoos ku bixisaa macluumaadka xiriirka oo dhamaystiran oo sax ah, si Buckeye ay kaala soo xiriito si looga shaqeyo xallinta arrinta.

Magaca xubinta:

Cinwaanka Xubinta:

Lambarka telefoonka ee Xubinta:

Lambarka MMIS ee Xubinta:

Mas'uulka Sharciga/ Waalidka Haya:

Miyaa arrintan lagu wargeliyay mid ka mid ah shaqaalaha Buckeye hadda ka hor? _____

Haddii ay haa tahay, goorma? _____ Qofkee? _____

Wax ay Tahay Cabashada: (Fadlan sheeg dhamaan faahfaahinta la xiriirta dhacdada laga hadlaya, oo ay ku jiraan magacyada, taariikhaha, meelaha, iwm Fadlan ku soo lifaaq warqado dheeraad ah oo ah dokumintiyada taageeraya wixii ku saabsan cabashada / rafcaanka, haddii loo baahdo.)

Wakiilka: _____ Taariikhda: _____

JOOJINTA XUBINIMADA

Joojinta Xubinimada

Luminta Xaq u Yeelashada Gargaarka Caafimaadka

Waxaa wax muhiim ah in aad ilaaliso wakhtiyada aad la ballansan tahay Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Degmada. Haddii aad ka maqnaato booqasho ama aad siin wayso macluumaadka ay ku weydiistaan, waxaad waayi kartaa xaq u yeelashada Gargaarka caafimaad. Haddii ay taasi dhici lahayd, Buckeye waxaa loo sheegi lahaa in ay joojiyaan xubinimada aad xubin ka tahay Gargaarka Caafimaadka mar dambana ma dabooli doonto Buckeye daryeelkaaga.

Luminta Warqadda Caymiska (Shahaadada Daboolid Kalsooni leh)

Markasta oo aad lumiso caymiska caafimaadka, waa inaad heshaa ogeysiin, oo loo yaqaan Shahaadada Daboolid Kalsooni leh, ee ka timaada shirkadda caymiskaagii hore taasoo sheegaysa inaad dib dambe u lahayn caymis. Waa wax muhiim in aad ku kaydiso nuqul ogeysiiskan ah diiwaanadaada, sababtoo ah waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad bixiso nuqul.

Cusboonaysiinta Xubinimada Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MCP) ee Tooska ah

Haddii aad lumiso u qalmida Gargaarka Caafimaadka, laakiinse dib ayey u bilaaban mar kale 60 maalmood gudahood, waxaa si toos ah u noqon doontaa xubin ka mid ah Buckeye mar kale.

Dhammaynta Xubinimadaada Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MCP)

Adiga oo xubin ka ah qorshaha daryeelka la maareeyey, waxaad xaq u leedahay in aad beddesho qorshahaaga daryeelka maareysan wakhtiyada qaarkood sanadka gudahiisa. Waxaad dooran kartaa in aad beddesho qorshahaaga daryeelka maareysan inta lagu jiro saddexda bilood ee ugu horeeya ee xubinimadaada ama inta lagu jiro muddada isdiiwaangelinta furan ee sanadlaha ah. Waaxda Gargaarka Caafimaadka ee Ohio waxay wax kuugu soo diri doontaa boostada si ay kuugu sheegan marka ay tahay muddadaad isdiiwaangelinta sanadlaha noqon doonto.

Haddii aad ku fakireyso in aad u beddesho qorshe caafimaad kale, waa inaad wax ka ogaataa xulashooyinkaaga, gaar ahaan haddii aad rabto inaa sii haysato dhakhtargaaga hadda ah. Xusuusnow, qorshe caafimaad walba waxay leedahay liis dhakhtaro iyo isbitaalo oo u gaar ah ee ay kuu ogolaan doonaan inaad isticmaasho. Qorshe caafimaad walba waxay sidoo kale leedahay macluumaad qoran ee sharxaya faa'iidooyinka ay bixiyaan iyo sharciyada ay layhiin. Haddii aad rabto macluumaad qoraal ah eek u saabsan qorshe caafimaad aad ku fakireysid inaad ku biirto ama haddii aad uun rabto inaad su'aalo ka weydiiso qorshe caafimaad, waxaad wici kartaa qorshaha ama ka wici kartaa Khadka Gargaarka Caafimaadka lambarka 1-800-324-8680; Qalabka maqalka fududeya 1-800-292-3572. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad ku saabsan qorshooyinka caafimaadka ee deegaankaaga adigoo booqanaya barta internetka ee Khadka Gargaarka Caafimaad www.ohiomh.com.

Haddii aad rabto inaad beddesho qorshaha daryeelkaaga maareysan waxaad ka wici kartaa Khadka Gargaarka Caafimaadka 1-800-324-8680; Qalabka maqalka fududeya 1-800-292-3572. Waxaad sidoo kale u gudbin kartaa codsi online ah bogga internetka Khadka Gargaarka Caafimaadka ee www.ohiomh.com. Wakhtiyada badan kood, haddii aad weydiisato inaad beddesho qorshahaaga ka hor 10-ka maalmood ee ugu dambeeya ee bisha, xubinnimadaada ee qorshahaaga hadda ah wuxuu dhamaan doonaa maalinta ugu dambeysa ee bisha. Haddii aad weydiisatid inaad beddesho wakhtigaa ka dib, xubinnimadaada qorshaha hadda ah wuxuu dhamaan doonaa maalinta ugu dambeysa ee bisha xigta. Qorshahaaga cusub ayaa kuugu soo diri doonaa macluumaadka boostada ka hor taariikhda bilaawga xubinimadaada,

Sababta Saxda ah ee Joojinta Xubinimada

Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in jiraan sababo gaar ah ee keena inaad u baahato inaad beddesho xubinimadaada qorshaha caafimaadka. Tan waxaa lagu magacaabaa "Sababta Saxda ah" ee joojinta xubinimada. Ka hor inta aadan codsan sababta saxda ah ee joojinta xubinimada waa in aad marka hore wacdaa qorshahaaga daryeelka ee maareysan oo aad siisaa fursad si loo xalliyo arrinta, haddii aysan awoodin inay xalliyaan arrinta, waxaad codsan kartaa joojinta sababta saxda ah wakhti kasta haddii aad leedahay mid ka mid ah sababaha soo socda:

1. Caymiska Daryeelka Caafimaadka ma dabooli karo adeega caafimaad ee aad u baahan tahay, diidmadaas oo ahayn mid la xiriirta diinta iyo anshaxa guud.
2. Dhakhtarkaaga ayaa sheegay in qaar ka mid ah adeegyada caafimaadka ee aad u baahan tahay in la helo wakhti isku mid ah iyo in dhammaan adeegyadaa aan laga heli karin liiska Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka.

3. Waxaad ka walaacsan tahay in aadan heli karin daryeel tayo leh iyo in adeegyada aad u baahan tahay aan laga heli karin bixiye kale ee ka mid ah liiska Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka.
4. Helid la'aanta adeegyada caafimaad ee lagama maar maanka ah ee gargaarka Caafimaadka ee daboolan ama helitaan la'aanta caymisyada khibradda u leh wax ka qabashada baahidaada caafimaad ee gaarka ah.
5. Caymiska Daryeelka Assaasiga ah ee aad dooratay kuma jiro liiska Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka iyo isaga ama iyada ayaa ahaa Caymiska Daryeelka Assaasiga ah ee kaliya ee ku hadla luuqadaada wuxuuna ku yaala masaaf/meel macquul ah oo adiga kuu dhow. Qorshe caafimaad ee kale ayaa ku leh Bixiye Daryeel Assaasi ah liiskooda oo ku hadlo luuqadaada oo na ku yaala masaaf/meel macquul ah oo kuu oggolaan doona bukaan ahaan.
6. Mid kale - Haddii aad u malaynayso in xubin kasii ahaanshaha qorshaha caafimaadka hadda ah uu waxyeello ku keenayo adiga ama dantaada.

Waxaad codsan kartaa inaad beddesho xubinimadaada ee Sababta Saxda ah adigoo ka wacaya Khadka Gargaarka Caafimaadka lambarka 1- 800-324-8680; Qalabka Maqalka Fududeeya 1-800-292-3572. Waaxda Gargaarka Caafimaadka ee Ohio ayaa dib u eegi doona codsigaaga ah beddelida xubinimada ee sababta saxda ah iyo inay go'aamiyaan haddii aad buuxisay sababaha sababta saxda ah. Waxaad ka heli doontaa warqad boostada oo kuu sheegi haddii Waaxda Gargaarka Caafimaadka Ohio ay joojin doonto xubinimadaada hadda ah iyo taariikhda ay bilaaban doonto xubinimadaada ee qorshaha cusub. Haddii la diido codsigaaga ee sababta saxda ah, Waaxda gargaarka Caafimaadka Ohio ayaa kuu soo diri doonta macluumaad kuu sharxeysa xaqa aad u leedahay dhegeysiga dowlada ee racfaanida go'aanka.

Waxyaabaha ay tahay inaad Maskaxda ku Hayso Haddii u Beddeli Xubinimadaada

Haddii aad raacdo mid ka mid ah tallaabooyinka kor ku qoran si aad u beddesho xubinimadaada, xasuuso:

- Sii wad inaad isticmaasho dhakhtarada iyo caymisyada kale ee Buckeye ilaa maalinta aad ka noqoto xubin qorshahaaga caafimaad ee cusub.
- Haddii aadan ka helin karaka Aqoonsiga xubinimada qorshahaaga caafimaad ee cusub ka hor maalinta ugu horeysa ee bisha xubinimadaada, wac waaxda Adeegyada Xubnaha ee Qorshaha. Haddii aysan awoodin in ay ku caawiyaan, wac Khadka Gargaarka Caafimaadka 1-800-324-8680; Qalabka Maqalka Fududeeya 1-800 292-3572.
- Haddii aad leedahay wax ah booqashooyin Caafimaad qabka oo jadwalsan, fadlan wac liiska bixiyayaasha qorshahaaga cusub si aad u hubiso in waraaqaha shaqada ee loo baahan yahay la dhamaystiray.

Xubinimada Ikhtiyaariga ah

Carruurta sagaal iyo toban (19) sano ka yar waxay ikhtiyaar u leeyihiin inaysan xubin ka noqon qorshe daryeel maareysan haddii ay yihiin:

- Qof walba oo xubin ka ah qabiilada Mareekanka asalka ah ee federaalahaan loo aqoon san yahay, iyadoon da'da la eegin.
- Shakhsiyadka hela adeegyada ka dhaafida eek u salaysan guriga iyo bulshada ee loo mara Waaxda Ohio ee Naafonimada Koritaanka (Ohio Department of Developmental).

Ka Reebida Xubinimada Caymiska Daryeelka Caafimaadka (MPC)

Shaqsiyaadka soo socda looma ogolo inay ku soo biiraan qorshaha daryeelka maareysan.

- *Dhab ahaan xaq u leh barnaamijka hoos yimaada labada ah Gargaarka Caafimaad iyo Daryeelka Caafimaadka;*
- *Hay'ad xanaano ku jira (ku jira dadka da'da weyn lagu xanaaneeyo iyo aan u qalmin qaybta hoos timaada Fidinta Dadka Waa weyn "Adult Extension", ku jira xarun daryeelka ee muddo dheer ah, ICF-IID ama nooc kale oo hay'ad ah).*
- *Hela adeegyada Ka Dhaafida Gargaarka Caafimaadka iyo aan u qalmin qaybta hoos timaada Fidinta Dadka Waa weyn (Adult Extension).*

Haddii aad aaminsan tahay in aad buuxin karto mid ka mid ah shuruudaha kor ku xusan oo aysan ahayn in aad noqoto xubin ka tirsan qorshaha daryeelka maareysan, waa inaad ka wacdaa Khadka Gargaarka Caafimaadka lambarka 1-800-324-8680 (qalabka maqalka fududeeya 1-800- 292-3572). Haddii aad buuxiso shuruudaha kor ku xusan, xubinimadaada Caymiska Daryeelka Caafimaadka waa la joojin doonaa.

Buckeye Ma Joojin Kartaa Xubinimadayda?

Buckeye waxay weydiisan kartaa Waaxda Ohio ee Gargaarka Caafimaadka in la joojiyo xubinimadaada sababo gaar ah dartood. Waaxda Ohio ee Gargaarka Caafimaadka waa inay aqbashaa codsiga ka hor inta xubinimadaada aan la joojin. Sababaha ay Buckeye u codsan karto inay joojiyaan xubinimadaada waa:

- Wixii khayaano ah ama isticmaalka xun ee kaarkaaga aqoonsiga Buckeye
- Wixii ah dabeecad rabsho ama is kaashi la'aan ah oo ay saamayn ku yeelato ilaa xad awooda Buckeye si ay kuu siiso adeegyada adiga ama xubnaha kale.

XUQUUQAHA XUBINIMADA

Xuquuqdaada Xubinimada

Adigoo xubin ka ah Buckeye, waxaad leedahay xuquuqahan soo socoda:

- In aad hesho dhamaan adeegyada ay bixiso Buckeye.
- In laguula dhaqmo si ixtiraam ah oo la xiriirta sharaftaada iyo arrimahaaga gaarka kuu ah.
- In aad habsato in macluumaadka diiwaanka caafimaadkaaga la ilaalin doono.
- In lagu siiyo macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga. Macluumaadkan waxaa sidoo kale laga yaabaa in uu heli karo qof aad si sharci ah ugu ogolaatay in ay helaan macluumaadka ama qofka aad sheegtay in lala xiriiro hadii xaalad degdeg ah ay dhacdo marka aysan ahayn dantaada caafimaad in aan adiga ku siino.
- In aad awoodo inaad ka qayb qaadata go'aamada ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga illaa haddii aysan aheen dantaada ugu fiican.
- In aad heshid macluumaad ku saabsan daweyn kasta oo daryeel caafimaad, oo lagugu siiyo hab aad la socon karto.
- In la hubiyo in dadka kale aysan maqli karin ama arki karin marka lagu siinayo daryeel caafimaad.
- In aad xor ka tahay nooc kasta oo xanibaad ama go'doomin ah iyada oo la adeegsanayo xoog, edbin, dabacsanan, ama aargoosi sida ku cad sharciyada federaalka ah.
- In aad weydiisato, oo aad hesho, nuqul ah diiwaanadaada caafimaadka, iyo aad awood u leedahay in aad weydiisato in diiwaanka la beddelao / la saxo haddii loo baahdo.
- In aad oran karto haa ama maya marka ay tahay bixinta wixii macluumaad ah ee kugu saabsan marka laga reebo macluumaadka ay Buckeye qasban tahay sharci ahaan.
- In aad oran karto haa ama maya marka ay tahay daaweyn ama bogsiiin. Haddii aad tiraahdo maya, dhakhtarka ama Buckeye waa inay kaala hadlan waxa dhici kara iyo waa in ay galiyaan warbixin ku saabsan arrintaa diiwaankaaga ama faylkaaga caafimaadka.
- In aad awoodo in aad xarayso racfaan, cabasho (dacwo) ama dhagaysiga dacwada dowlada. Eeg bogagga 25-28 ee buugyarahan wixii macluumaad ah.
- In aad heli karto dhamaan macluumaadka xubinimada Buckeye oo qoraal ah:
 - Oo lacag la'aan ah;
 - Oo ku qoran luqadaha aan Ingiriisiga aheen ee dadka xubnaha badan kood ku hadlaan ee goobaha adeegyada Buckeye;
 - Oo ku qoran siyaabo kale, oo kaa caawinaya baahida gaarka ah ee xubnaha oo laga yaabo in ay dhibaato ka haysato akhrinta macluumaadka sabab kasta ha ahaatee.
- In aad awoodo in aad Buckeye iyo bixiyeyaasheeda caafimaadka ka hesho caawimaad lacag la'aan ah haddii aadan ku hadlin afka Ingiriisiga ama u baahan tahay in lagaa caawiyo in aad fahamto macluumaadka.
- In aad heshid caawin luqadda calaamadaha ah haddii maqalkaagu liito.

- In lagu sheego haddii Caymiska Daryeelka caafimaadka uu yahay arday iyo in aad awoodo diidida daryeelkiisa ama daryeelkeeda.
- In lagu sheego wixii daryeel tijaabo ah iyo in aad awood u leedahay in aad diido ka qayb galida daryeelka.
- In aad samayso dardaaran (dardaaran adoo nool). Fiiri buugga yar ee ku jira buugyaraha cusub ee xubnimada oo kuu sharraxaya waxii ku saabsan dardaaranka. Waxaad kaloo la xiriiri kartaa adeegyada xubinta si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- In aad ka xarayso wixii cabasho ah oo ku saabsan in aan la raacin dardaarankaaga Waaxda Caafimaadka Ohio.
- In aad beddesho Caymiska Daryeelka aasaasiga ah oo aad ku biirto Bixiye Caafimaad ee kale ee ku yaala liiska Buckeye ugu yaraan bil kasta. Buckeye waa inay kuu soo dirtaa qoraal sheegaya cida ay tahay bixiyaha caafimaadka cusub taariikhda isbeddelka.
- In aad xor u tahay fulinta xuquuqdaada, sidoo kale ogaato in Buckeye, caymisyada Buckeye ama Waaxda Gargaarka Caafimaadka ee Ohio aysan kugu ciqaabi doonin taasi.
- In aad ogaato in Buckeye ay u hogaan sanaato dhammaan sharciyada gobolka iyo kan federaalka, iyo sharciyada kale ee ku saabsan arrimaha gaarka ah ee lagu dhaqmo.
- Si aad u xulato Bixiyaha ku siinaya daryeel mar kasta oo ay suuragal tahay oo haboon.
- Haddii aad tahay qof dumar ah, si aad u aado bixiyaha caafimaadka dumarka ee ku jira liiska Buckeye ee adeegyada caafimaadka dumarka ee daboolan.
- In aad awoodo in aad ka hesho aragti labaad bixiye aqoon leh oo ku qoran liiska Buckeye. Haddii uusan awoodin bixiye aqoon leh in uu ku arko, Buckeye waa inay kuu qorshaysaa booqosho bixiye caafimaad oo aan ku jirin liiskooda.
- In aad naga hesho macluumaad ku saabsa Buckeye.
- Si aad u gala xiriirto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Dalka Maraykanka iyo Xafiiska Xuquuqda Madaniga iyo / ama Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Ohio, Xafiiska Xuquuqda Madaniga cinwaanada hoose wixii cabasho ah oo ku saabsan takoorka ku salaysan jinsiyad, midab, diin, nooca jinsiga, nooca galmada, da'da, naafada, asalka wadanka, xaaladda halyeeyga, isirka, xaaladda caafimaad ama baahida adeegyada caafimaadka.

Office for Civil Rights

United States Department of Health and Human Services
233 N. Michigan Avenue, Suite 240
Chicago, Illinois 60601
(312) 886-2359; (312) 353-5693 TTY

Bureau of Civil Rights

Ohio Department of Job and Family Services
30 E. Broad Street, 30th Floor
Columbus, Ohio 43215
(614) 644-2703; 1-866-227-6353;
1-866-221-6700 TTY; Fax: (614) 752-6381

WAAJIBAADKA XUBINIMADA

Waajibaadkaaga Xubinimada

Marka aad xubin ka tahay Buckeye, waxaad sidoo kale leedahay dhowr waajibaad ah. Waa in la barto iyo la fahmo xaq kasta oo aad leedahay ee hoos yimaada barnaamijka Gargaarka Caafimaadka. **Taas waxaa ka mid ah waajibaadka ah in aad:**

- Weydiiso su'aalo haddii aadan fahmin xuquuqda aad leedahay.
- Isbeddel in aad ku samayso qorshahaaga caafimaad iyo Caymiska Daryeelka aasaasiga ah sida uu qeexayo Barnaamijka Gargaarka Caafimaadka iyo Buckeye.
- Ilaali ballamada lagu qorsheeyay.
- In aad haysato Kaarka Aqoonsiga.
- Ogeysii Caymiska Daryeelka Assaasiga ah daaweynta qolka xaaladaha degdegga ah.
- Jooji ballamada goor hore hadii aadan oofin karayn.
- Haddii Buckeye ay ku siinayso gaadiid aad ku tagto ballan caafimaad, waa in aad keentaa kursiga ilmaha gaariga ku fuulaan Haddii uu ilmahaagu jiro 4 sano ama ka yar, ama haddii culeyska ilmuha ka yar yahay 40 rodol.
- Had iyo jeer la xiriir Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah ama khadka Talo-Bixinta Kalkaaliye ee Buckeye marka ugu horaysa ka hor inta aadan helin baahida caafimaad ee aan deg dega ahayn.
- Tag qolka xaaladda degdegga ah kaliya marka aad u maleynayso inay tahay xaalad degdeg ah.
- In aad la wadaagto macluumaadka ku saabsan xaaladdada caafimaad Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah iyo si buuxda laguugu sheego wixii ku saabsan fursadaha adeega iyo daaweynta. Taasi waxaa ka mid ah waajibaadka ah in aad:
 - U sheegto Bixiyahaaga Daryeelka Assaasiga ah wixii ku saabsan caafimaadkaaga.
 - In aad kala hadasho caymisyadaada caafimaadka waxii ku saabsan baahidaada caafimaad iyo waydii su'aalo ku saabsan siyaabaha kala duwan ee loo daawayn karo dhibaatooyinkaaga caafimaadka.
 - Ku caawi caymisyadaada caafimaadka in ay helaan diiwaanadaada caafimaadka.
 - Si firfircoon uga qayb qaado go'aannada la xiriira adeegyo ammaan ah iyo fursadaha daawaynta, samee doorashooyin shakhsiyeed, oo qaado talaaboyin si aad u ilaaliso caafimaadkaaga.

Taas waxaa ka mid ah waajibaadka ah inaad:

- Ula shaqayso si wada jir ah bixiyahaaga go'aansashada waxa uu yahay daryeelka caafimaad oo adiga kuugu wanaagsan.
- Samee intii awoodada ah si aad u ahaato qof caafimaad qaba.
- Ula dhaqan bixiyaasha iyo shaqaalaha si xushmad leh.

MACLUUMAAD KALE

- Buckeye waxay deegyo siisaa xubnaha sababta oo ah Buckeye heshiis ayay la gashay Waaxda Gargaarka Caafimaadka ee Ohio. **Haddii aad rabto inaad la xiriirto Waaxda Gargaarka Caafimaad ee Ohio waxaad ka wici kartaa ama ugu qori kartaa:**

Ohio Department of Medicaid Bureau of Managed Care P.O. Box 182709

Columbus, Ohio 43218-2709

1-800-605-3040 or 1-800-324-8680

TTY: 1-800-292-3572

Waxaad sidoo kale booqan kartaa barta internetka ee Waaxda Gargaarka Caafimaadka ee Ohio:

www.medicaid.ohio.gov

- Waxaad la xiriiri kartaa Buckeye si aad u hesho wixii macluumaad kale oo aad rabtid, oo ay ka mid yihiin qaab-dhismeedka iyo hawlgalka Buckeye, iyo sida aan lacagta u siino bixiyayaasheena.
- Haddii aad rabto in aad noo sheegto wax aad u malaynayso in aan beddelno, fadlan naga soo wac waaxda Adeegyada Xubnaha lambarka 1-866-246-4358 (qalbka maqalka fududeeya 1-800-750-0750).
- Waxaad xaq u leedahay inaad sameyso talo soo jeedin ku saabsan siyaasadaha Xuquuqda iyo Waajibaadka Xubinta Buckeye.
- Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisano Buckeye sida aan u qiimeeyno nidaamka cusub ee daryeelka caafimaad iyo adeegyada aan u daboolno faa'iido ahaan.
- Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato Buckeye sababaha go'aanada aan qaadano ee ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga.
- Haddii aan nahay Buckeye arrimaha gaarka kuu ah aad ayay muhiim nagu yihiin. Waxaan sameyn doonaa wax walba oo aan awoodno si aan u ilaaliyo diiwaannada caafimaadkaaga. Sharci ahaan, waa in aan ilaalino diiwanadaada caafimaadkaga iyo aan kuu soo dirno Ogaysiiska Arrimaha Qaaska kuu ah, taas oo aynu ku soo darnay dhamaadka buugyarahan. Wargelinta Arrimaha gaarka kuu ah waxay kuu sheegaysaa sida aynu u isticmaalno diiwaankaaga caafimaadka Wuxuuna qeexayaa marka aan la wadaagi karno diiwaanadada dadka kale. Wuxuuna sharaxayaa xuquuqdaada ku saabsan isticmaalka diiwaanadaada caafimaadka. Waxa kale oo uu kuu sheegayaa sida loo isticmaalo xuquuqdaas iyo dadka arki kara diiwaankaaga caafimaadka. Ogeysiiska ma khuseeyo macluumaad aan adiga lagugu aqoonsan karin. Marka aan ka hadleyno diiwaannadaada caafimaadka gudaha ogeysiiska, waxaa ka mid ah wixii macluumaad ah ee ku saabsan caafimaadkaga maskaxda ama jirka ee lasoo dhaafay ama hadda ah inta aad tahay xubin ka mid ah Buckeye. Tani waxaa ka mid ah daryeel siinta caafimaad aad hesho. Waxa kale oo ka mid ah lacag bixinta daryeelkaaga caafimaadka inta aad tahay xubin naga mid ah.

Shil Dhaawac ama Jiro ah (Ku beddelida qof kale/Subrogation)

Haddii xubin Buckeye ka mid ah u tago dhakhtar dhaawac ama cudur uu sababay qof ama ganacsi kale, Waa inaad soo wacdaa waaxda Adeegyada Xubinta si aad noola soo socodsiiiso. Tusaale ahaan, Haddii aad ku dhaawacantay shil baabuur, qaniinis eey, ama haddii aad dhacdo oo dhaawac kaaso gaaro dukaan markaas shirkad caymis ee kale ayaa laga yaabaa inay bixiso biilka dhakhtarka iyo / ama isbitaalka. Marka aad na soo wacdo waxan u baahan doonaa magaca qofka qaladka iska leh, shirkadahoda caymiska iyo magaca/magacyada qareenada ku lugta leh.

Caymiska Caafimaad ee Kale (iskuduwidka Faa'iidooyinka Caymiska)

Haddii adiga ama qof ka mid ah qoyskaaga uu la leeyahay caymis caafimaad shirkad kale, waxaa aad muhiim u ah in aad wacdo waaxda Adeegyada Xubnaha iyo shaqaalaha kiiskaaga ee gobolka si aad ugla hadasho caymiska. Tusaale ahaan, haddii aad shaqayso oo aad leedahay caymis caafimaad, ama haddii carruurtaada ay kula jiraan caymis caafimaad waalidka kale markaa waxaad u baahan tahay inaad wacdo waaxda Adeegyada Xubnaha si aad noo siiso macluumaadka. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad wacdo adeega xubnaha iyo shaqaalaha kiiskaaga degmada haddii aad lumisay caymiska caafimaadka oo aad horey u soo sheegtay. Haddii aadan na siin macluumaadkan taasi waxay keeni kartaa dhibaatooyin la xiriira helitaanka daryeelka iyo biilasha.

WARGELINTA ASTURIDA

Qorshaha Caafimaadka Buckeye ee Dhaqanada Asturida

OGEYSIISKAN WAXA U SHARXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA SHAACIN KARO IYO SIDA AAD U HELI KARTID MACLUUMAADKAN.

FADLAN SI TAXADAR AH U EEG.

Laga bilaabo bisha Janaayo 1, 2013

Wixii caawimaad ah oo ku saabsan turjumidda ama fahmidda qoraalkan, fadlan wac 1-866-246-4358. (Qalabka Maqalka Fududeeya 1-800-750-0750).

Si necesita ayuda para traducir o entender este texto, por favor llame al telefono. 1-866-246-4358. (TTY 1-800-750-0750).

Adeegyada Turjumaanka waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan.

Waajibaadka Hay'adda Daboolan:

Qorshaha Caafimaadka Buckeye waa Haytetedaboolan sida ku qeexan ama ku sharciyaysan Xeerka Qaadashada iyo Awooda Caymiska Caafimaadka ee sanadkii 1996 (HIPAA). Qorshaha Caafimaadka Buckeye waxaa si sharci ah looga baahan yahay inay u hayaan si gaar ah macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisin (PHI). Waa in aan ku siino Ogeysiiskan. Waxaa ka mid ah waajibaadka sharciga ah iyo dhaqanka asturida la xiriira macluumaadkaaga caafimaad ee ilaalisin (PHI-gaaga). Waa in aan raacno qawaaniinta ogaysiiskan hadda. Waa in aan kuu sheegno haddii ay jirto jebinta arrimaha macluumaadkaaga caafimaad ee ilaalisin ee aaminka aheen.

Ogeysiiskan wuxuu kuu sharxayaa sida laga yaabo in aan u isticmaalno Macluumaadkaga Caafimaadka ee Ilaalisin (PHI). Wuxuuna qeexayaa xuquuqdaada in aad hesho, beddesho iyo maareeyso Macluumaadkaga Caafimaadka ee Ilaalisin (PHI-gaaga). Waxa kale oo uu sheegaya sida loo isticmaalo xuquuqda.

Qorshaha Caafimaadka Buckeye waxay beddeli kartaa Ogeysiiskan. Waxaan xaq u leenahay in aan beddel ku sameeyno Ogeysiiska Macluumaadkaga asturan ah oo aan hore u haysano. Waxa kale oo aan yeeli karnaa in aan ku fulino Macluumaadka Caafimaadka ee Ilaalisin (PHI) ee adiga aan kaa helno mustaqbalka. Qorshaha Caafimaadka Buckeye wuxuu si degdeg ah u cusbooneysiin doonaa oo uu ku siin doonaa Ogeysiiskan mar kasta oo ay jiraan wax is beddel ah oo ku yimaada waxyaabaha soo socda ee ku xusan ogeysiiska:

- Isticmaalada iyo Shaacinta
- Xuquuqdaada
- Waajibaadkeena Sharciga ah
- Dhaqanada Asturida ee kale ee lagu sheegay ogeysiiskan.

Ogeysiisyada la cusboonaysiiyay wuxuu ku jiri doonaa boggeena internetka iyo Buugyaraha Xubnaheena. Waxan sidoo kale oo aan kuu soo diri doonaa nuqul ka mid ah haddii aad codsato.

Isticmaalada iyo Shaacinta Macluumaadka:

Waxyaabaha soo socda waa liiska sida laga yaabo in aan u isticmaalno ama u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan anagoo aanan kaa haysan fasax ama oggolaansho:

- **Daaweynta.** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno ama u shaacino macluumaadkaaga caafimaad ee ilaalisan dhakhtar ama bixiye daryeel caafimaad ee kale ee ku daaweynaya. Waxaan taas u samaynaa si aan isku duwno daaweyntaada caymisyada dhexdooda. Waxaan sidoo kale aan sidan u samaynaa si ay nooga caawiso go'aamada la xiriira in aan bixino oggolaansho hore ee gargaarkaaga.
- **Lacagt-bixinta.** Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama shaacino Macluumaadkaaga Caafimaad ee ilaalisan si aan ku siino faahay ee Ilaalacag-bixinta ee adeegyada daryeelka caafimaadka ee aad heshay. Waxaan laga yaabaa inaan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan iyadoo ujeedadu tahay lacag bixinta qorshe caafimaad ee kale ama bixiye daryeel caafimaad, ama hey'ad kale. **Tani waa inay waafaq santahay Sharciyada Asturida ee federaalka. Lacag-bixinta waxaa ka mid noqon kara:**
 - Ka shaqeynta sheegashooyinka
 - Gocdashooyi qalmida ama sheegashada caymiska
 - Bixinta Biilasha Dheeraadka ah
 - Dib u eegista adeegyo caafimaad oo lagama maarmaanka ah
 - Sameeynta dib u eegista isticmaalka sheegashooyinka
- **Hawlaha Daryeelka Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno ama shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan si aan u gudano howlaheena daryeelka caafimaadka.

Waxqabadyadan waxaa ka mid noqon kara:

- Bixinta adeegyada macaamiisha
- Wax ka qabashada cabashooyinka iyo racfaanada
- Bixinta maaraynta kiiska iyo isu-duwidda daryeelka
- Sameynta dib u eegista sheegashada caafimaad iyo qiimeyn tayada ee kale
- Hagaajinta waxqabadyada

Marka aan samaynayno Hawlahena daryeelka caafimaadka ah, waxaan siin karnaa Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan shirkadaha ganacsiga aan la leenahay. Waxaan la saxiixan doona heshiis qoran shirkadaha ganacsi si loo ilaaliyo asturnaanta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan (PHI). Waxaa laga yaabaa in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan Hayld kale ee waafaqsan sharciyada asturida federaalka. **Hayeraalka. abaa sidoo kale kula lahaataa xiriir ku saabsan hawlgalkeeda caafimaadka. Tan waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda:**

- Tayo qiimeynta iyo hawlaha horumarinta
- Dib u eegista aqoonta ama shahaadooyinka xirfadlayaasha caafimaadka
- Maamulka Kiisaska isu-duwidda daryeelka
- ogaanshaha ama ka hortagga musuqmaasuqa iyo xad-gudubka daryeelka caafimaadka
- **Xusuusinta Ballamada / Daaweynta Beddelka ah.** Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan si aan kuu xusuusino ballan daaweyn iyo daryeel caafimaad. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u isticmaalno ama shaacino si aan kuu ogeysiino macluumaad ku saabsan beddelo daaweyn ah. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u isticmaalno ama u shaacino faa'iidooyin iyo adeegyo kale ee laxiriira caafimaad dartood. Tusaale ahaan, macluumaadka ku saabsan sida loo joojiyo cabista sigaarka ama luminta miisaanka badan.
- **Sida looga baahan yahay Sharciga.** Haddii sharciga federaalka, gobolka, iyo / ama sharciga degaanka u baahan yahay isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisan, waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno ama shaacino macluumaadkaaga. Waxaan isticmaalnaa ama shaacinaa Macluumaadkaaga markii ay waafaq santahay sharciga. Isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga caafimaad ee ilaalisan wuxuu ku xadidan yahay u baahnaanta sharciga. Waxaa dhici karta in sharciyo ama xeerar kale is khilaafaan. Haddii ay taasi dhacdo waxaan aqbali doonaa sharciyada ama xeerarka dheeraadka ah ee sii xadidan.

- **Waxqabadyada Caafimaadka Dadweynaha.** Waxaa laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan maamulka caafimaadka dadweynaha si looga hortago ama loo xakameeyo cudur, dhaawac, ama curyaanimo. Waxaa laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA). Waxaan taas u samayna si loo hubiyo tayada, ammaanka ama waxtarka badeecada ama adeegyada ay gacanta ku hayso Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA).
- **Dhibbanayaasha ku xadgudubka iyo Dayacaadda.** Waxaa laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan maamulka degmo, gobol, ama xukuumadda federaalka. Tan waxaa ka mid ah adeegyada bulshada ama wakaaladda adeegyada ilaalinta oo sharcigu u fasaxayo in ay helaan warbixinnadaada. Waxaan sidaas u samayn doonaa haddii aan aamin sanahay in ay jiraan xadgudub, dayacid, ama rabshada qoyska.
- **Tallaabooyinka Maamulka iyo Sharciga.** Waxaa laga yaabaa inaan shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan marka ay jiraan dhagaysiga maxkamadda iyo maamulka. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u shaacino si aan uga jawaabno waxyaabaha soo socda;
- **Hirgelinta Sharciga.** Waxaan u siidayn karnaa Macluumaadkaaga qaybta sharci fulinta marka loo baahan yahay in sidaas la sameeyo. Tusaale ahaan, si aan uga jawaabno:
 - Amar maxkamadeed
 - Warqad Amar-maxkamadeed
 - U yeeris maxkamadeed
 - Qoraal maxkamadeed oo uu soo saaray sarkaalka garsoorkar
 - Amar-maxkamadeed oo ka socda garsoorayasha maxkamadda
 - Codsiiyo sharciyeed ee la mid ah
- **Fulinta Sharciga.** Waxa laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan fuliyayaasha sharciga marka loo baahdo inaan sidaas sameeyno.

Tusaale ahaan, marka laga jawaabay:

- Amar maxkamadeed
- Amar maxkamadeed oo warqad ah
- Yeerista maxkamadeed
- Yeeris uu soo saaray sarkaalka maxkamadeed
- Yeerista Garsoore sare

Waxa sidoo kale laga yaabaa in aan shaacino Macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan si aan u aqoonsano ama helno qof la tuhunsan yahay, qof baxsaday, marqaati xog haya, ama qof lumay.

- **Baaraha dadka dhintay, Baarayaasha Caafimaadka iyo Maamulayaasha mayd-aasidda.** Waxaa laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan baaraha dadka dhinta, ama baaraha caafimaadka. Tani waxaa laga yaabaa in loo baahdo, tusaale ahaan, si loo ogaado sababta dhimashada. Waxa sidoo kale laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan agaasimayaasha aasida, hadba sida loogu baahdo, si ay u fuliyaan waajibaadkooda.
- **Ku Deeqidda Xubin, Il iyo unug.** Waxaan laga yaabaa inaad u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalinta ururada qaadista xubnaha dadka.

Waxa sidoo kale oo laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan kuwa ka shaqeeya qaadidda, kaydinta ama xubin abuurida ah:

- Xubnaha maydka
- Indhaha
- Unugyada jirka

- **Halista Ammaanka iyo Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno ama u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan haddii aan aaminsan nahay, si niyad wanaag ah, in loo baahan yahay in laga hortago ama la yareeyo halis mar dhow dhici rabta. Tan waxaa ku jira halista caafimaadka ama nabadgelyada qof ama dadweynaha.
- **Qaybaha Dawlada ee Gaarka ah.** Haddii aad tahay xubin ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka, waxaa laga yaabaa inaan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan haddii ay u baahdan maamulka ciidanka. Waxa kale oo laga yaabaa in aan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan:
 - Si loogu ogolaado mas'uuliinta federaalka sababtuna tahay ammaanka qaranka
 - Waxqabadyada Sirdoonka
 - Waaxda Arrimaha Dibadda si ay go'aan uga gaarto ku habboonanta caafimaad
 - Wixii adeegyada difaaca u ah Madaxweynaha ama qof kale oo loo idmay
- **Magdhowga Shaqaalaha.** Waxaa laga yaabaa inaan shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan si aan ugu hoggaansano sharciyada la xiriira magdhowga shaqaalaha ama barnaamijyada kale ee la mid ka ah, oo uu sharciyo jideeyay. Kuwani waa barnaamijyo laga helayo magdhowga dhaawac ama cudur shaqada la xiriira iyada oo aan loo eegin in qalad dhacay.
- **Xaaladaha Degdegga ah.** Waxaa laga yaabaa inaan shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan haddii aadan awoodin in aad noo soo jawaabto ama aadan joogin. Tani waxaa ka mid ah hadii xubin ka mid ah qoyska, saaxiib shakhsi oo dhow, hay'adda gargaarka masiibada oo la ansixiyay, ama qof kasta oo kale oo aad wax nooga sheegtay. Waxaan isticmaali doonaa go'aan xirfad iyo waayo-aragnimo leh si aan u go'aamino haddii ay shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan dantaada ay ku jirto. Haddii ay ku jirto dantaada, waxaan u shaacin doonaa oo kaliya Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan ee sida tooska ah khusaysa qofka ku hawlan daryeelkaaga.
- **Cilmi-baaris.** Mararka qaarkood, waxaa laga yaabaa inaan u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan cilmi-baarayaasha marka daraasadooda cilmi-baarista bukaanka la ansixiyay. Waa in ay hirgaliyan tallaabooyin gaar ah si loo ilaaliyo Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan.

Heshiiska Afka ee Istickmaalka iyo Shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan

Waxaan qaadan karnaa heshiiska afka ah in aan isticmaalno iyo u shaacino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee ilaalisin dadka kale. Tan waxaa ka mid ah xubnaha qoyska, saaxiibo shakhsi dhow ama qof kasta oo kale oo aad garanayso. Waxaad diidi kartaa in la isticmaalo ama la shaaciyo Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan wakhtiga la codsaday. Waxaad na siin kartaa heshiis afka ah ama diidmo xilli hore. Waxa kale oo aad na siin kartaa wakhtiga isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga caafimaadka ee Ilaalisan. Waxa aan xaddidi doonaa isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan marka ay tahay xaaladaha/kiisaska. Waxa aan ku xaddidnaa macluumaadka waxa si tooska ah u khuseysa ku lug lahaanshaha qofka daawaynta daryeelkaaga caafimaadka ama lacag bixinta.

Waxaan aqbali karnaa heshiis afka ah ama diidmo in la isticmaalo iyo la shaaciyo Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan marka ay dhacaan xaaladdo musiiabad ah. Waxaan u shaacin Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan hay'ad loo ansixiyay gargaarka masiibooyinka. Waxa aan xaddidi doonaa isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga caafimaadka ee Ilaalisan xaaladaha/kiisaska. Waxaan ku koobi doona in aan gaarsiino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan xubin ka mid ah qoyska, qof adiga wakiilka kaa ah ama qof kale oo mas'uul ka ah daryeelkaaga, meesha aad joogto iyo xaaladda guud. Waxaad na siin kartaa heshiis afka ah ama diidmo xilli hore. Waxa kale oo aad na siin kartaa wakhtiga isticmaalka ama shaacinta Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan.

Istickmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisin, ee u baahan qoraalkaaga ogolaansho

Waxaa nalaga rabaa in la helo qoraalkaaga ogolaanshaha si loogu isticmaalo ama shaaciyo Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan, ayadoo ay jirto ka reebid yar, sababahaan soo socda awgood:

- **libinta Macluumaadkaaga caafimaadka ee Ilaalisan.** Waxaan codsan doonaa qoraal ansixin ah ka hor inta aanan sameyn shaacinta u muuqan kara libinta macluumaadkaaga caafimaadka ee Ilaalisan. libinta macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisin waxay kadhigantahay inaan lacag ku heleyno shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisin qaabka sidaan ah.
- **Suuqgeyn.** Waxaan codsan doonaa qoraalkaaga ansixinta si aan ugu isticmaalno ama u shaacino macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisin sababo suuqgeyn awgeed marka laga reebo arrimo gaar ah oo xadidan. Tusaale ahaan, marka aan kula yeelanno wada hadal suuqgeyn waji-ka-waji ah. Ama, marka aan bixino hadiyad dhiirigalin qiimo magac ahaan u jirta.

- **Caddeymaha daaweyn dhimirka ah.** Waxaan codsan doonaa qoraal ansixin ah si loogu isticmaalo ama u shaacino wax walba oo ku saabsan caddeymaha daaweyntaada dhimirka taas oo laga yaabo inuu agteena ku haro faylka marka laga reebo arrimo gaar ah oo xadidan. Tusaale ahaan, lacag-bixinta daaweyn gaar ah ama hawlgal hawl daryeel caafimaad.

Dhammaan isticmaalka iyo shaacinta macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan oon lagu qeexin Ogeysiiskan dhexdiisa waxaa la sameyn doonaa oo kliya marka qoraalkaaga ogolaansho la helo. Wakhtigaad doonto ayaadna dib u ceshan kartaa ogolaanshahaaga. Codsiga dib ula laabashada ogolaanshuhu waa inuu qoraal ahaado. Codsigaaga inaad ogolaanshihi dib u ceshatay wuxuu dhaqan gali doonaa isla markaas aad codsatay. Waxaa jira laba arrimood oon horay saameyn ka yeelan doonin isla marka aad codsato. Xaaladda hore waa marka aan horayba tillaabo uqaadnay iyadoo ku saleysan ogolaanshahaagii hore. Arrinta xigtana waa inta uusan nasoo gaarin qoraalkaaga codsi joojinta ah.

Xuquuqdaada

Ariimahan soo socdaa waa xuquuqdaada khuseysa macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan. Haddii aad rabto inaad isticmaasho xuquuqahaan soo socda midkood, fadlan nala soo xariir. Macluumaadka nagala soo xiriiri kara waxaad ka heli kartaa dhamaadka Ogeysiiskan.

- **Xaq ulahaansho codsi xayiraad.** Waxaad xaq uleedahay inaad weydiisato xayiraadda isticmaalka ama bixinta macluumaadka caafimaadkaaga khaaska ah lacag-bixinta daaweynta ama hawlgallada daryeelka caafimaad. Waxaad sidoo kale warsan kartaa kashifidda dadka ku hawllan daryeelkaaga ama lacag-bixinta daryeelkaaga. Midaan waxaa kujira xubnaha qoyska ama saaxiibada kuu dhow. Codsigaagu waa inuu sheegayo ama muujiyo xayiraadaha/xanibaadda aad dooneyso. Sidoo kale waa in lasheegaa cidda xayiraaddu quseyso/qabanayso. Nalakama rabo/looma baahna inaan oggolaano codsigaan. Haddaan oggolaanno, waxaan uhogaansami doonaa codsigaaga xayiraadda. Uma hogaansami doono xayiraadda haddii warbixinta loobaahanyahay ay kuxirantahay in lagusiiyo daaweyn xaalad deg deg. Sikastaba ha ahaatee, waxaan xayiri doonaa isticmaalka ama bixinta macluumaadka caafimaadkaga khaaska ah lacag-bixin ama hawlgallada daryeelka caafimaad, qorshaha caafimaadka marka aad adeegga ka bixisay jeebka ama wax ka mid ah si buuxda.
- **Xaqa aad u leedahay inaad Codsato Wadda-hadal Qarsoodi ah.** Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato inaan xariir kula yeelan karno ee ku saabsan macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan siyaabo kale ama goobo kale. Xaqani wuxuu shaqeynayaa ama dhaqan galayaa kaliya haddii war bixintu khatar kuu keeni karto haddii aan waddooyinkaas ama goobahaas lagu xiriirin. Looma baahna inaad sharaxdo sababta codsigaaga. Hase yeeshee, waa in aad sheegtaa in macluumaadku khatar ku galin karo haddaan isbeddelka lasameyn. Waa in aan codsigaaga la shaqaynaa haddii uu macquulyahay/sabab leeyahay sheegayana qaabka kale ama goobta ku haboon in lagu siiyo macluumaadkaaga caafimaadkaga ee ilaalisan.
- **Xaqa helidda iyo siinta nuqul ka mid ah Macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan.** Waxaad xaq u leedahay, marka in yar laga reebo, in aad eegto ama aad hesho nuqullo ah Macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan ee loogu talo galay diiwaan cayiman. Waxaad na weydiin kartaa in aan ku siino nuqul qaab kale ah oo aan ahayn foto-koobi. Waxaan isticmaali doonaa qaabka aad na weydiisatay haddii ay macquul tahay in aan samayno. Waa in aad nagu weydiiso qoraal ahaan si aad u hesho Macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan ku siin doonaa sharaxaad qoraal ah. Waxaan kuu sheegi doonaa haddii sababaha loo diiday codsigaaga dib loo eegi karo. Waxa kale oo aan kuu sheegi doonaa sida aad u weydiisan karto dib u eegis ama haddii diidmada aan lagu samayn karin dib u eegis.
- **Xaqa aad u leedahay beddelida Macluumaadkaaga Caafimaad ee Ilaalisan:** Waxaad xaq u leedahay in aad na weydiisato in aan beddelno Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan haddii aad aaminsan tahay in ay ku jiraan macluumaad qalad ah. Waa in aad nagu weydiisato qoraal. Waa in aad sharaxdo sababta macluumaadka loo beddelayo. Waxaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga sababo gaar ah dartood. Tusaale ahaan, haddii aanan abuurin macluumaadka aad doonayso in la beddelo, iyo Abuuraha Macluumaadkaaga caafimaadka ee ilaalisan uu awoodo inuu kuu beddelo. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan ku siin doonaa sharaxaad qoraal ah. Waxaa laga yaabaa inaad noo soo dirto qoraal aad ku diidayso go'aankeena. Waxaan qoraalkaga kusoo lifaaqi doona Macluumaadka caafimaadkaga aad na waydisatay in aan beddelno. Haddii aan aqbalno codsiga aan ku beddelo macluumaadkaga, waxaan samayn doonaa dadaal macquul ah si aan u wargelino dadka kale isbeddelka. Taas waxaa ku jira dad aad adigu magacawdo. Waxa kale oo aan ku dadaali doonaa in aan ku raacino isbeddelada macluumaadka ee mustaqbalka.
- **Xaqa aad u leedahay Helitaanka inta Jeer ee la Shaaciyey Macluumaadka Caafimaadka ee Ilaalisan.** Waxaad xaq u leedahay in aad hesho liiska wakhtiyada muddada 6 sano ee la soo dhaafay, taas oo annaga ama shirkadaha aan ganacsiga wadaagnaa ay shaaciyeen Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Ilaalisan. Taasi ma khuseyso shaacinta macluumaadka ujeedadeedu ay tahay daaweynta, kharash bixinta, waxqabadyada caafimaadka, ama shaacinta macluumaadka aad fasaxday iyo hawlaha kale ee gaarka ah. Haddii aad na weydiisato macluumaadka in ka badan hal mar muddo 12-bilood ah, waxaa laga yaabaa in aan kaa qaadno lacag macquul ah, kharash ku salaysan ka jawaabidda codsiyada dheeraadka ah. Waxaan ku siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kharashadka wakhtiga codsigaaga.

- **Xaqa aad u ledahay Xareynta Cabashada.** Haddii aad dareento in xuquuqdaada asturnaanta lagu xadgudbay ama in aan ku xad gudubnay dhaqanadeena asturnaanta waxaad xarayn kartaa cabasho. Waxa kale oo aad cabashada ku samayn kartaa telefoonka. Isticmaal macluumaadka xiriirka ee ku yaalla dhammaadka Ogaysiiskan. Waxa kale oo aad u gudbin kartaa cabasho qoraal ah Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee dalka Maraykanka. Eeg warbixinta xiriirka bogga internetka ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha. Haddii aad codsato, waxaan ku siin doonaa cinwaanka si aad u xereyso cabasho qoraal ah oo ku socota Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha. **MA QAADAN DOONO WAX TALLAABO EE ADIGA LAGAAGA SOO HORJEEDO HADDII AAD XERAYSO CABASHO.**
- **Xaqa Aad u Leedahay Helitaanka nuqul ogeysiiskan.** Waxaad codsan kartaa nuqul ka mid ah Ogaysiiskan wakhti kasta. Isticmaal macluumaadka xiriirka ee ku qoran dhamaadka Ogeysiiskan. Haddii aad ka hesho Ogeysiiskan boggeena internet-ka ama emailka, waxaad codsan kartaa nuqul warqad ah ee Ogeysiiska.

Macluumaadka Xiriirka

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, habka-dhaqankeena la xirirra macluumaadkaga gaarka ah iyo sidii aad u adeegsan lahayd xuquuqdaada waxaad noola soo xiriiri kartaa qoraal ahaan. Waxa kale oo aad nagala soo xiriiri kartaa telefoonka. Isticmaal macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

Buckeye Health Plan

Attn: Privacy Official
4349 Easton Way, Suite 400
Columbus, OH 43219
866-246-4358 (800-750-0750)

DARDAARANKA HORE

"Isticmaalka dardaaranka hore si aad u sheegto waxa aad rabto ee kusaabsan daryeelkaaga caafmaad"

Dad badan ayaa maanta qaba walwal ku saabsan daryeelka caafmaad oy heli karaan haday si daran uxanuunsadaan oo doonaya in rabitaankooda laga dhigo mid macruuf ah/la ogyahay.

Dadka qaarkood waxaa laga yaabaa in aanay rabin in bilo ama sannado taageero nolosha dheereysa ah waqti ku bixiyaan halka Qaar kalena ay doonayaan in tallaabo kasta oo oo nolosha sii dheereyn karta laqaado.

Waxaad Leedahay Ikhtiyaar

Tiro sii kordheysa oo dadka ka mid ah ayaa u dhaqmaaya sidii ay rabitaankooda uga dhigi lahaayeen mid cad/la yaqaanno. Waxaad kusheegi kartaa inaad daryeelka caafmaadka khaaska rabtid qoraal inta aad caafmaad qabtid ood wax dooran kartid.

Xaruntaada daryeelka caafimaad waa in ay kuu sharaxdaa xaqqa aad uleedahay in aad u sheegto rabitaanka ku saabsan daryeel caafimaad. Waxaa sidoo kale waajib ah in lagu dalbo rabitaankaada hadii aad hoos kusoo qortay qaab qoraal ah.

Macluumaadkan waxaa uu sharaxayaa xuquuqdaada xagga sharciga Ohio si ay u aqbalaan ama u diidaan daryeel caafimaad. Waxay kaa caawin doontaa inaad dooratid daryeel caafimaad oo kuu gaar ah.

Macluumaadkan waxaa kaloo uu sharaxayaa sida aad u sheegi kartid waxa aad rabto ee ku saabsan daryeelka aad rabi lahayd haddii aadan dooran karin naftaada.

Macluumaadkan kuma jirto talo xagga sharciga ah, laakiin wuxuu kaa caawin doonaa inaad fahamto xuquuqdaada xagga sharciga ah.

Wixii talo sharci, waxaa laga yaabaa in aad rabto in aad la hadasho qof qareen ah. Wixii macluumaad ah oo ku saabsan adeegyada sharciga oo bilaash ah, wac 1-800-589-5888 Isniinta ilaa Jimcaha, 8:30 subaxnimo - 5 galabnimo.

Maxay yihiin xuquuqahaygu?

Waxaad xaq u leedahay in aad dooratid daryeel caafimaad oo kuu gaar ah. Haddii aadan rabin nooc ka mid ah qaar ka mid ah daryeelka, waxaad xaq u leedahay inaad u sheegtid dhakhtarkaaga in aadan rabin.

Maxaa dhacaaya hadii aan aad u jiranahay oonan go'aan gaari karin? Maxaa dhacaaya hadii aanan sameyn karin rabitaanadeyda la yaqaan?

Inta badan dadku wey uga dhigi karaan rabitaankooda ku saabsan daryeelka caafimaad mid la yaqaanno dhakhaatiirtooda laakiin dadka qaar ayaa aad u xanuunsan aana awoodin in ay u sheegaan dhaqtarkooda nuuca daryeel ay rabaan.

Sida ku cad sharciga Ohio, waxaad xaq u leedahay inaad buuxiso foomka inta aad awooda u leedahay in aad matasho naftaada. Foomku wuxuu u sheegayaa dhakhaatiirtaada waxa aad doonayso in lagu sameeyo haddii aadansheegi karinta rabitaankaaga.

Waa maxay noocyada kala duwan ee foomamka jira?

Sida ku cad sharciga Ohio, waxaa jira afar nooc oo foom oo kala duwan, ama dardaaranka, waxaad isticmaali kartaa. Waxaad isticmaali kartaa ama Will Living ah, ama dardaaranka qoraalka ah oo aad isticmaali karto. Waxaad isticmaali kartaa Dardaaranka Qofka nool ama Baaqa Daawaynta Caafimaadka Maskaxda, Awoodda sharciga ah Garyaqaanka ee Daryeelka Caafimaadka ah ama Amarka Hasoo Naaxin ee qofka.

Waxaad buuxisaa dardaaranka hore inta aad awoodo in aad matali kartid naftaada. Dardaaranka wuxuu ogaysiinayaa dhakhtarkaaga iyo kuwa kaleba inay ogaadaan daryeelkaaga caafimaad.

Ma waxaan u baahanahay in aan buuxiyo dardaaran ka hor inta aanan helin daryeel caafimaad?

Ma jiro qof kugu qasbi kara inaad buuxiso qoraal dardaaran ah. Waa go'aansan kartaa haddii aad rabto in aad mid buuxiso.

Yaa buuxin kara dardaaranka hore?

Qof kasta oo 18 sano jir ah ama ka weyn oo dhimirkiisu dhan yahay oo go'aan u gaar ah ayaa buuxin kara.

Ma u baahanahay qareen?

Maya, uma baahnid qareen si aad u buuxiso dardaaranka. Sidaas oo ay tahayna, waxaad go'aan san kartaa in aad la hadasho qareen.

Miyay tahay in dadka i siiya daryeelka caafimaad raacaan rabitaankeyga?

Haa, haddii rabitaankaagu raacsan yahay sharciga gobolka. Si kastaba ha ahaatee, sharciga Ohio waxaa ka mid ah qodobka damiirka qofka. Qofka ku siinaya daryeelka caafimaad waxaa laga yaabaa inuusan awood u yeelan inuu raaco rabitaankaaga sababtoo ah waxay ka hor imaanaysaa damiirkiisa/keeda. Haddii ay sidaas tahay, waxay kaa caawin doonaan inaad hesho qof kale oo raaci doonaa waxaad jeceshahay.

Dardaaranka Qofka Nool

Foomkan wuxuu kuu ogolaanayaa inaad u qortid rabitaanka ku saabsan daryeelkaaga caafimaad si qoraal ah. Waxaad dooran kartaa waxa aad rabto haddii aad si daran u jirato si loo sameeyo rabitaankaaga kuu gaarka ah. Waxaad sheegi kartaa marka aad rabtid ama aadan rabin in lagu siiyo cunto iyo biyo aan la farsameyay.

Side dardaaranka Qofka nool u shaqayn doontaa?

Dardaaranka Qofka nool wuxuu sheegayaa inta aad rabto in aad isticmaasho hababka taageera noloshu qofka bukaanka ah. Waxaa la samyn karaa kaliya markii aad:

- Ku jirto koomo oo aan la filayn inay dhamaato, AMA
- Marka aan waxba lagaaga qaban karin gargaar caafimaad oo aan rajo laga qabin in xaalkaagu fiican doonoqaba, AMA
- La filayo in aad dhimato oo aadan samayn karin rabitaankaaga in la ogaado.

Dadka ku siinaya daryeelka caafimaad waa in ay sameeyaan waxa aad ku sheegtay Dardaarankaaga. Dardaaranka Qoran xaq ayuu u siinayaa in ay raacan rabitaankaaga.

Adiga kaliya ayaa bedeli karaama joojin kara Dardaarankaga. Waxaad sidaas samayn kartaa wakhti kasta.

Amarka Dib -Ha-U Naaxin Qofka Bukaanka Ah

Xeerarka Gobolka waxay bixiyaan amarka Dib Ha U Naaxin ee hab-maamuska Daryeelka iyo Raaxada ee ay hormarisay Waaxda Caafimaadka Ohio. Amarka Dib Ha U Naaxin macnaheedu waa amarka uu soo saaray dhakhtar ama, xaaladaha qaarkood, kal-kaaliye caafimaad oo shahaado ama takhasus leh ama kalkaaliyeyaal daaweynta guud taas oo cadaynaysa in qof bukaan ah oo la aqoonsaday aan lagu samayn gargaarka deg dega ah. Gargaarka deg dega ah waxay ka dhigan tahay Kicinta Wadnaha ama soo kicinta qayb ka mid ah wadnaha iyo sanbabbada, laakiin waxaan ka mid ahayn in qof marinada neefsashada loo baneeyo taasoo aan ka mid ahayn Gargaarka deg dega ah.

Amarka Dib Ha U Naaxin ee Hab-maamuska Daryeelka iyo Raaxadawuxuu ka adlayaawaxqabadyada gaarka ah ee shaqaalaha gurmada, dhakhaatiirta xaalada deg dega caafimaad, farsamo yaqaanada caafimaad ama kalkaaliyeyasha waxay qaadan doonaan marka ay u tagayaan bukaanka Amarka Dib Ha U Naaxin. Hab maamuusku waxaa kale uu sheegayaa wixiitallaabooyin gaar ah la qaadi doonin.

Waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga wax ku saabsan amarka Dib Ha U Naaxin.

Awoodda Sharci Ee Garyaqaanka

Awoodda Sharci ee Garyaqaanka daryeelka caafimaadka waa ka duwan yahay noocyada kale ee awoodaha Garyaqaanka. Qoraalkan yari waxa uu ka hadlayaa oo keliya Awoodda Sharci ee Garyaqaanka oo ku saabsan daryeelka caafimaadka, kuma saabsana noocyada kale ee awoodaha Garyaqaanka.

Awoodda Sharci ee Garyaqaanka waxay kuu ogolaanayaa inaad doorato qof si ay u fuliyaan rabitaankaaga daryeelkaaga caafimaad.

Qofka adiga ayu ku matalayaa hadii aadan is matali karin. Tani waxay noqon kartaa muddo gaaban ama muddo ka dheer.

Yaan doortaa?

Waxaad dooran kartaa qof wayn oo qaraabada ama saaxiib aad ku kalsoon tahay in ay kuu matalaan marka aadan matali kartin naftaada. Iska hubi in aad kala hadasho qofka waxa aad rabto. Kadibna ku qor foomka waxa aad rabtid in aad samayso iyo waxa aadan aadan rabin. Sidoo kale waa inaad kala hadasho dhakhtarkaaga waxa aad rabto. Qofka aad dooratid waa inuu raacaa rabitaankaaga.

Goormee Hirgalaysaa Awoodda Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka ee ii gaarka ah?

Foomkan wuxuu dhaqan kaliya marka aadan u dooran karin daryeelka naftaada, haddii ay tahay muddo gaaban ama dheer.

Foomka wuxuu u ogolaanayaa qof ehelka ama saaxiib ah in ay joojiyaan taageerada nololsha xaaladahan soo socda oo kaliya:

- Haddii aad ku sugan tahay koomo oo aan la filayn in ay dhamaato, ama
- Ama haddii la filayo in aad dhimato.

Baaqa Daawaynta Caafimaadka Maskaxda

Baaqa Daawaynta Caafimaadka Maskaxda wuxuu fiiri gaar ah siinayaa daryeelka caafimaadka maskaxda. Waxay u ogolaanaysa qofka, inta uu taagta leeyahay, inuu qabsado wakiil wax u go'aamin kara oo afkiisa ku hadla marka uusan lahayn awood uu go'aan ku gaari karo. Intaas waxaa dheer, caddayntu waxay qeexi kartaa rabitaanka gaarka ah oo ku saabsan daaweynta. Qofku wuxuu kuu tilmaami karaa ikhtiyaarada daweynta, iyo rabitaanada ku saabsan jiifinta/ku haynta xarunta caafimaad.

Bayaanka Daawaynta Caafimaadka Maskaxda wuxuu baddelayaa Awooda Qareenka ee Caafimaadka Maskaxda, laakiin ma baddelayo dardaaranka qof nool.

Dardaaranka Hore

Waa maxay farqiga u dhexeeya Awoodda Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka iyo Dardaaranka qof nool?

Dardaarankaga qof nool wuxu sharaxaaya, qoraal ahaan, nooca daryeelka caafimaadka aad rabto haddii aadan caddayn karin rabitaankada. Awoodda Qareenka waxay kuu ogolaanaysa inaad doorato qof kuu fuliya rabitaankaaga daryeelka caafimaadka marka aadan matali karin nafsadaada.

Haddii aan haysto Awoodda Qareenka ee Daryeelka caafimaadka, miyaan u baahan doonaa Dardaaranka hore?

Waxaa laga yabaa inaad doonaysid labada. Mid kasta wuxuu wax ka qabanayaa meelo kala duwan oo daryeelkaaga caafimaad ah. Dardaarankagu wuxuu ogaysiinayaa rabitaankaga si toos ah dhakhaatiirta, laakiin wuxuu sheegayaa oo kaliya rabitaankaaga ku saabsan isticmaalka hababka taageeridda noloshu.

Awoodda Qareenka ee daryeelka caafimaadka waxay u ogolaanaysa qofka aad doorato in uu fuliyo rabitaankaaga oo dhan ee daryeelka caafimaadka marka aadan matali karin naftaada. Awoodda Qareenka ee daryeelka caafimaadka laguma baddelayo Dardaaranka qofka nool.

Ma beddeli karaa dardaarankayga hore?

Adiga, ayaa bedeli kartaa dardaaranka markasta oo aad rabto. Haddii aad horey u samaysay dardaaranka, iska hubi in aad raacdo sharciga Ohio (oo dhaqan galay bisha Oktoobar 10, 1991). Waxaa laga yaabaa in aad dooneysid in aad la xiriirto qareen si uu kuu caawiyo. Waa fikrad wanaagsan inaad eegto dardaaranka aad samaysay wakhti ka wakhti. Iska hubi in uu ka hadlayo waxa aad rabto iyo inuu taabanayo dhinac kasta.

Haddii aadan haysan dardaaranka hore, yaa ii dooraya daryeelka caafimaadka markii aanan dooran karin?

Sharciga Ohio wuxuu u ogolaanayaa in qofka reerkaaga ee kuugu dhow kuu doori karo daryeelka caafimaad haddii la filayo in aad dhimato oo aadan matali karin naftaada. Haddii aad ku sugan tahay koomo in aan la filaynin inay dhamaato, qofka kuugu dhow qaraabadada ayaa go'aansan kara in la joojiyo ama aan la isticmaalin qalabka caawiya noloshu qofka bukaanka ah 12 bilood ka dib. Qofka ehelka kuugu dhow ayaa go'aansan kara in la joojiyo ama aan la isticmaalin cuntada iyo biyaha artifishaalka ah sidoo kale (hoos eeg).

Arimaha Kale Oo Laga Fekero

Maxay kula tahay joojinta ama isticmaal la'aanta cuntada iyo artifishaalka ah?

Cunto iyo biyo artifishaalka ah ee la qaybiyo waxaa loola jeedaa in nafaqada ay jirkaaga u qaybiso tuubooyin la galiyay gudaha jirkaaga. Haddii aad go'aansanto in aad isticmaasho iyo in aad joojiso waxay ku xiran tahay xaaladdaada caafimaad.

- HADDII la filayo inaad dhimato oo aadan fulin karin rabitaankaaga IYO haddii dardaarankagu sheegayo in aadan rabin hababka qalabka taageera noloshu qofka bukaanka ah oo loo isticmaalo in lagu sii dheereeyo noloshu, HADDABA Cuntada iyo biyaha artifishaalka ah waa la joojin ama lama isticmaalayo.
- HADDII la filayo in aad dhimato ama muujin Karin waxa uu yahay rabitaankaaga, IYO haddii aadan aadan samayn dardaaranka qofka nool HADDABA Sharciga Ohio wuxuu dhigayaa in qofka qaraabada kuugu dhow uu joojin karo ama aan la isticmaalin karin cuntada iyo biyaha artifishaalka ah.
- HADDII aad ku jirto kooma taasoo oo aan la filayn inay dhammaato, IYO haddii uu sheegayo dardaarankaagu in aadan rabin in lagu siiyo cunto iyo biyo artifishaal ah HADDABA cuntada iyo biyaha artifishaalka waa la joojinayaa ama lama isticmaalayo.
- HADDII yaad ku jirto koomo oo aan la filayn inay dhamaato, IYO haddii aadan haysan dardaaranka qofka nool HADDABA sharciga Ohio wuxuu u ogolaanayaa qofka ehelka kuu dhow inuu joojiyo ama aan la isticmaalin in lagu siiyo cunto iyo biyo artifishaal ah. Hasa ahaatee, isagu ama iyadu waa in ay sugaan 12 bilood oo ay oggolaansho ka helaan Maxkamadda dhaxalka.

Buuxinta dardaraan hore ah, Ma waxaan ka qeyb qaadanaya ismiidaaminta caawiska ah mise sababidda geerida qof bukaan ah?

Maya, sharciga Ohio ma oggola sababidda geerida qof bukaan ah ama isdilida caawiska ah.

Halkee ayaan ka heliyaa foomamka dardaaranka hore?

Qaar badan oo ka mid ah dadka iyo meelaha aad ka hesho daryeelka caafimaad waxay hayaan foomamka dardaaranka hore. Weydii qofka ku siiyey buug-yarahan foomka dardaaranka– Dardaaranka qofka nool ama Awoodda Sharciga ee garyaqaanka Daryeelka caafimaadka ama Qaraarka Daawaynta Caafimaadka Maskaxda. Sidoo kale qareen ayaa ku caawin kara.

Maxaan ku sameeyaa foomamka kadib markii aan buuxiyo?

Waa in aad nuqulo siiso dhakhtarkaga iyo xarunta daryeelka caafimaadka si ay gelyaan diiwaankaaga ama faylkaaga caafimaadka. Hal nuqul sii xubin qoyska ka mid ah ama saaxiib aad aamin santahay. Haddii aad dooratay qof ka socda Awoodda Sharciga Garyaqaanka ee daryeelka caafimaadka, sii qofkaa nuqul.

Nuqul dhex gali waraaqaha kuu gaarka ah. Waxaa laga yaabaa inaad siiso mid ka mid ah nuqulkaas qareen ama wadaad diimeed. Iska hubi inaad u sheegtid qoyska ama saaxiibada wixii aad samaysay. Ha iloobin gebi ahaanba foomamkan marka aad dirto.

Deeqitaanka Xubnaha Iyo Unugyada Jirka

Dadka Ohio ku nool waxay dooran karaan haddii ay jeclaan lahaayeen in xubnaha iyo unugyada ay ugu deeqaan dadka kale haddii ay dhintaan. Iyadoo sheegaya ikhtiyaarkooda, waxay hubin karaan in rabitaankooda loo fulin doono si degdeg ah iyo in qoyskooda iyo kuwa ay jecel yihiin in aysan qaadi doonin culayska go'aan-qaadashada wakhtigan sidiisaba adag. Qaar ka mid ah xubnaha lagu deeqi karo waa wadnaha, sambabada, beerka, kelyaha iyo xammeetida. Qaar ka mid ah unugyada lagu deeqi karo waa maqaarka, lafaha, seedaha, xididdada iyo indhaha.

Waxaa jira laba siyaabood oo la isku diiwaan gelin karo si aad ugu deeqdo xubnaha iyo unugyada jirka:

- Waxaad sheegi kartaa rabitaankaaga in aad ku deeqdo xubnaha iyo / ama unugyada jirka marka aad hesho ama cusboonaysiiso liisankaaga darawalnimada ee Ohio ama Kaarka Aqoonsiga Gobolka, ama
- Waxaad soo buuxin kartaa Foomka Diiwaangelinta Deeqayaasha xubnaha jirka ee ku lifaaqan Foomka Dardaaranka Qofka Nool ee Ohio, oo ku soo celi Xafiiska Gawaarida ee Ohio.

CAAWINAADA LUQADDA

English:

ATTENTION: If you speak English, language assistance services, free of charge, are available to you. Call 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Spanish:

ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Chinese Mandarin:

注意: 如果您使用繁體中文, 您可以免費獲得語言援助服務。請致電 1-866-246-4358 (TTY: 711)。

German:

ACHTUNG: Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlos sprachliche Hilfsdienstleistungen zur Verfügung. Rufnummer: 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Arabic:

ملحوظة: إذا كنت تتحدث اذكر اللغة، فإن خدمات المساعدة اللغوية تتوافر لك بالمجان. اتصل برقم 1-866-246-4358 (رقم هاتف الصم والبكم: 711).

Pennsylvania Dutch:

Wann du Deitsch (Pennsylvania German / Dutch) schwetzsch, kannscht du mitaus Koschte ebber gricke, ass dihr helft mit die englisch Schprooch. Ruf selli Nummer uff: Call 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Russian:

ВНИМАНИЕ: Если вы говорите на русском языке, то вам доступны бесплатные услуги перевода. Звоните 1-866-246-4358 1-866-549-8289 (телетайп: 711).

French:

ATTENTION : Si vous parlez français, des services d'aide linguistique vous sont proposés gratuitement. Appelez le 1-866-246-4358 (ATS : 711).

Vietnamese:

CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 1-866246-4358 (TTY: 711).

Cushite:

XIYYEEFFANNAA: Afaan dubbattu Oroomiffa, tajaajila gargaarsa afaanii, kanfaltiidhaan ala, ni argama. Bilbilaa 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Korean:

:
1-866-246-4358 (TTY: 711)

Italian:

ATTENZIONE: In caso la lingua parlata sia l'italiano, sono disponibili servizi di assistenza linguistica gratuiti. Chiamare il numero 1-866-2464358 (TTY: 711).

Japanese:

注意事項: 日本語を話される場合、無料の言語支援をご利用いただけます。1-866-246-4358 (TTY: 711)まで、お電話にてご連絡ください。

Dutch:

AANDACHT: Als u nederlands spreekt, kunt u gratis gebruikmaken van de taalkundige diensten. Bel 1866-246-4358 (TTY: 711).

Ukrainian:

УВАГА! Якщо ви розмовляєте українською мовою, ви можете звернутися до безкоштовної служби мовної підтримки. Телефонуйте за номером 1-866-246-4358 (телетайп: 711).

Romanian:

ATENȚIE: Dacă vorbiți limba română, vă stau la dispoziție servicii de asistență lingvistică, gratuit. Sunați la 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Somali:

LA SOCO: Haddii aad ku hadasho Ingiriisi, adeegyada taageerada luqada, oo bilaash ah, ayaad heli kartaa, Wac 1-866-246-4358 (TTY: 711).

Nepali:

!यान िदनहोसु : तपाइल% े नेपाली बो#नहु '(छ भने तपाइक% ो िनि#त भाषा सहायता सेवाह& िन:श&कु !पमा उपल\$ध छ । फोन गन\$होसु ् 1-866-246-4358 (िटिटवाइ: 711) ।

QORAALKA TAKOORID LA'AANTA

Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye wuxuu u hoggaansamaa shuruucda xuquuqda madaniga ee Federaalka iyo ma samayso midab takoor ku saleysan jinsiyad, midab, assalka wadan, da'da, naafada, jinsiga. Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye kama reebayo dadka ama ulama dhaqmayo si kala duwan sababtoo ah jinsiyada, midab, asal qaran, da ', naafonimo, ama jinsiga.

Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye:

- Waxay bixisaa qalab iyo adeegyo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka naafada ah si ay si waxtar leh nala soo xiriiraan, sida:
 - Turjubaanada luqadda dhegeysiga
 - Macluumaad qoran oo ku qoran qaabab kale (faro waawayn, maqal, qaabab elektaroonik ah, qaabab kale)
- Waxay bixisaa adeegyo luqadeed oo bilaash ah oo loogu talagalay dadka luqaddooda koowaad aysan afka Ingiriisiga ahayn, sida:
 - Turjubaano aqoon leh
 - Macluumaad ku qoran luqado kale

Haddii aad u baahan tahay adeegyadan, kala xiriir Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye 1-866-246-4358 (Qalabka Maqalka Fududeeya 1-800-750-0750).

Haddii aad aaminsan tahay in Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye aysan ku guulaysan inay bixiso adeegyadan ama lagu takooray hab kale oo ku saleysan jinsiyadai, midab, asal qaran, da ', naafonimo, ama jinsiga, waxaad u fayl gareen kartaa/ xareyn kartaa cabasho: Qorshaha Caafimaadka Buckeye ee Qeybta Rafcaanada (Buckeye Health Plan at the Appeal Unit), 4339 Easton Way, Suite 400, Columbus, OH 43219, 1-866-246-4358 (TTY: 1-800-750-0750), Fax 1-866-719-5404. Waxaad ku fayl gareen kartaa cabasho qof ahaan ama boostada, fakiska, ama emailka. Haddii aad u baahato caawimaad ku saabsan fayl gareynta cabashada, Qorshaha Caafimaadka ee Buckeye ayaa diyaar u ah inuu ku caawiyo. Waxaad sidoo kale fayl gareen kartaa cabasho ah xuquuqda madaniga Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah si elektaroonig ahaan ah iyada oo loo marayo Xafiiska Portalka Cabashada Xuquuqda Madaniga, oo laga heli karo <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, ama boostada ama taleefoonka: U.S. Department of Health and Human Services, 200 Independence Avenue SW, Room 509F, HHH Building, Washington, DC 20201, 1-800-868-1019, 800-537-7697 (TDD) .

Foomamka
cabashada
waxaa laga heli
karaa
<http://www.hhs>.



Fadlan naga soo wac lambarka: 1-866-246-4358
Qalabka Maqalka Fududeeya: 1-800-750-0750

gov/ocr/office/file/index.html.



Fadlan naga soo wac lambarka: 1-866-246-4358
Qalabka Maqalka Fududeeya: 1-800-750-0750



**4349 Easton Way, Suite 300
Columbus, OH 43219**

Fadlan naga soo wac lambarka: 1-866-246-4358

TTY: 1-800-750-0750

BuckeyeHealthPlan.com